Bath & Body Works®

# Xeerka Anshaxa


moonlit goddess
WHITE BARN
French Lavender, Pear Blossom, Golden Vanilla
Exclusively fragranced soy wax blend candle
moonlit goddess
WHITE BARN
Exclusively fragranced soy wax blend candle
8 oz / 227 g

## Warqad ka socoto madaxa fulinta (CEO) ... 2

## Sida loo Adeegsado Xeerka Anshaxa ... 3

Qiraalka ... 3
Qiyamyadayada ... 4
Xeerka Habdhaqanka ... 4
Siyaasadaha Goonida Ah ... 4
Hab-raacyada ... 4

## Ku Hoggaaminta Qiyamyadayaga: Ballanqaadkayaga Iyo Isla Xisaabtankayaga ... 5

Ku hoggaaminta Qiyamyada ... 5
Waajibaadka Dheeraadka ah ee Hoggaamiyeyaasha ... 5
Ka-dhaafitaannada ... 5
Hadal: Na Weydii Su'aalo oo Muuji Walaacyada ... 5
Faa'iidada Wadaxiriiradayada Furan ... 5

## Ku Hoggaaminta Qiyamyadayaga: Adiga iyo Goobta Shaqada ... 6

Waxaa Dhacayo Marka aad La Xiriirto Khadka Tooska ah ee Anshaxa? ... 6
Aargoosasho ... 6
Daacadnimada ... 7
Diiwaangelinta Waqtiga ... 7
Caafimaadka iyo Badqabka Goobta Shaqada ... 7
Lama Oggola Rabshada Goobta Shaqada; Lama Oggola Hub ama Qoryo ... 7
Fursad Loo Siman Yahay ... 7
Kahortagga Faraxumaynta ... 8
Ilbaxnimada, Kahortagga Takoorka iyo Dhibaataynta Kale ... 9

## Ku Hoggaaminta Qiyamyadayaga: Sida Aan U Ganacsano ... 10

Hagitaanka ka Warbixinta Dhibaataynta, Takoorka iyo Aargoosiga ... 10
Goob Shaqo oo Xor ka ah Mukhaadaraadka iyo Qamriga ... 10
Iskaashi la Yeelashada Alaab-qeybiyeyaasha Mas'uulka ah ... 10
Mas'uuliyadda Deegaanka ... 10
Tayada Baddeecada ... 10
Ganacsiga Caalamiga ... 10
Lacag Dhaqida ... 11
Iska Hor Imaadka Danaha ... 11
Tartanka iyo Heshiiska Cadaaladda leh ... 13
La Falgalidda Dawladaha ... 13
Kaqeybgalka Siyaasadeed ... 13
Laaluushka iyo Musuqmaasuqa ... 13
Hadiyadaha Ganacsi iyo Martigelinta ... 14
Bixinta Hadiyadaha iyo Martigelinta ... 14
Aqbalida Hadiyadaha iyo Martigelinta ... 15

## Ku Hoggaaminta Qiyamyadayaga: Shirkadayada iyo Adiga ... 16

Daacadnimada Maaliyadeed iyo Diiwaanada Saxda ah ... 16
Ilaalinta Macluumaadka Shaqsiyeed iyo Midka Ganacsi ... 17
Hantidhowrida iyo Baaritaanada ... 18
Isticmaalka Hantida Shirkadda ... 18
Macluumaadka Xog-Ogaalka ... 18
Hantida Aqooneed ... 19
Wadaxiriirada Dibadeed ... 19
Isticmaalida Baraha Bulshada ... 20
Deeqaha Samafalka ah iyo Dalabaadka ... 20

## Ku Hoggaaminta Qiyamyadayaga: Adeegsiga Anshaxeena ... 21

Siyaasadaha La Xiriira ... 21

Kooxda,

Qiyamyadayada waxay nagu xiraan dhaxalkayada waxayna nagu hagaan mustaqbalkeena. Ma qeexaan oo kaliya **waxa** aanu qabano laakiin **sida** aanu u qabano.

**Noqda Qaar Isticmaalaha Jecel. Noqda Deeqsi. Noqda Dhiirane. Midooba. Noqda Qaar lala Xisaabtamo.**

Qiyamyadani waa muhiim sababtoo ah waxay qaabeeyaan sida aynu dhexdeena u macaamillo, sida aynu isticmaalayaasha ula dhaqanno, iyo sida aynu ula dhaqanno cid kasta oo ku kalsoon shirkaddeena.

Xeerkeena Anshaxa waxa asaas u ah qiyamyadan. Waa khayraad naga caawiyo inaan qeexno habdhaqanada aynu nafteena ka filayno–-waxa la aqbali karo iyo wixii aan la aqbali karin. Haddii lagu qeexay Xeerka (Code-ka), habraacyadayada caadiga ah ee shaqo fulinta, ama ilo kale oo ganacsigeenna ka tirsan, waxa aan kaa filayno waa kuwo isku mid ah kuna dhisan isla mabaadi’daas.

Bath & Body Works waxay mar walba ku guulaysatay inay noqoto shirkad hal-abuur leh, fikrado cusub curisa, isla markaana leh ruux ganacsi. Taasna waxa la socda fursad iyo masuuliyad labadaba—inaan u dhaqanno si daacadnimo leh, dadka ula dhaqanno si ixtiraam leh, isla markaana gaadhno go’aanno aan ku faani karno oo aan garab istaagi karno.

Mid kasta oo naga mid ah wuxuu ka ciyaaraa door ilaalinta Xeerka. Taasi waxay ka dhigan tahay inaan waqti ku qaadanno akhrintiisa, fahamno waxa nalaga doonayo, isla markaana hadalno marka wax aan sax ahayn ama aan fiicnayn dareenno. Haddii aad waligaa qabto su’aalo ama aad aragto dhaqan u muuqda mid aan waafaqsanayn qiyamkeenna ama Xeerkan, waxaan kugu dhiirrigelinayaa inaad arrinta gudbiso—adoo la hadlaya maamulahaaga, saaxiibkaaga Waaxda Shaqaalaha, kooxda Anshaxa & Hoggaansanaanta Guud, ama adoo adeegsanaya khadka Ethics Hotline oo aad ka helayso **bbw.ethicspoint.com**.

Tani waa ballanqaad wadajir ah iyo sidoo kale mid shaqsiyeed. Waa arrin aasaasi u ah cidda aan nahay shirkad ahaan—iyo kalsoonida aan maalin kasta kasbanno.

Waad ku mahadsan tahay inaad doorkaaga qaadato.



Daniel Heaf
Sarkaalka Madaxa Fulinta
Bath & Body Works

# Sida loo Adeegsado Xeerka Anshaxa

## Waa inaan u adeegsano Xeerka Anshaxa si uu noogu hago gaarista go'aannada saxda ah.

Iyadoo qayb ka ah ballanqaadkeena ku aadan qiyamyadeena, waxaan rabnaa inaan hubino inaad haysato agabyada aad u baahan tahay si aad go'aano wanaagsan ugu gaartid Bath & Body Works iyo hawlwadaagyadeena. Xeerkeena waxaa uu ku saleysan yahay qiyamkeena wuxuuna qeexayaa halbeegyadeena iyo filashooyinkeena wuxuuna adiga kuu tilmaamaya hawlwadaagayaasha Bath & Body Works ee diyaarka ah si ay kuu caawiyaan. Marka lagu daro Xeerka, sidoo kale waxaa lagaa filayaa inaad u hogaansanaato siyaasado iyo habraacyo kasta oo kale ee lagu dabaqi karo doorkaaga iyo shaqadaada.

Waxaan ka sameynaa ganacsi adduunka oo dhan, marka siyaasadahayagu mararka qaarkood way ka duwan yihiin xeerarka, sharciyadda, caadooyinka iyo qawaaniinta maxalliga ah. Markay u muuqato inuu jiro isku dhac, waa inaad sida caadiga ah u hoggaansantaa shuruudaha aadka u xaddidan. Si kastaba ha noqotee, hadduu caado dhaqameedku u muuqdo inuu ku xadgudbayo qiyamkeena ama haddii aadan hubin habka saxda ah ee wax looga qabto xaalad gaar ah, kala xiriir maareeyahaaga, jaalkaaga Waaxda Shaqaalaha, ama waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa (EthicsandCompliance@bbw.com).

## Agaasimeyaasha, saraakiisha iyo hawlwadaagayaasha Bath & Body Works waa inay u hoggaansamaan Xeerkeena Anshaxa.

Dhinacyada saddexaad ee matalaya Bath & Body Works waxaa sidoo kale laga codsan karaa inay u hoggaansamaan arrimaha khuseeya Xeerkeena Anshaxa. Hawlwadaagayaasha Bath & Body Works ee la shaqeynaya dhinacyada saddexaad waa inay hubiyaan in dhinacyada saddexaad ay hayaan macluumaad habboon oo ku saabsan shuruudaha siyaasadeena waana inay soo sheegaan anshax-darrada dhinaca saddexaad ama ku xadgudubyo suurtagalka ah ee ku aadan sharciga Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa.

# Qiraalka

## Waxaan ka codsaneynaa dhammaan danwadaagta inay caddeeyaan Xeerkayaga Anshaxa, oo loola jeedo:

- Inaad akhrisay oo oggolaatay inaad u hoggaansanaato qiyamyadeena, Xeerka Anshaxa iyo dhammaan siyaasadaha shirkadda ee khuseeya doorkaaga.
- Inaad fahamsan tahay sida Xeerka Anshaxa uu ula xiriiro doorka aad ka ciyaarto Bath & Body Works.
- Inaad oggoshahay inaad waydiiso su'aalo xiriirada ku habboon marka aadan hubin habka saxda ah ee aad qaadi lahayd.
- Inaad ku dhammeyn doonto dhammaan tababbarka loo baahan yahay waqtiga ku habboon.
- Inaad fahamsan tahay filashadayada ah inaad soo sheegto tuhunka jebinta Xeerkayaga Anshaxa.
- Inaad iskaashi nagala sameyn doonto baaritaan kasta oo jebinta suurtagalka ah.
- Inaad fahamtay Xeerkan Anshaxa inuusan ahayn heshiis shaqo, oo laga yaabo inaan wax ka beddelno waqti kasta.
- Saxiixaaga elektirooniga ah waxaa uu ka dhigan yahay dhammaystirkaaga Xeerka Anshaxa iyo dhammaan siyaasadaha kale ee shirkadda ee khuseeya doorkaaga.






# Qiyamyadayada

## Aasaaska waxa aan sameyno oo dhan

- U heellanow Macaamiisha
- Deeqsi Noqo
- Dhiirranow
- Midooba
- Is Xisaabi

# Xeerka Habdhaqanka

## Tilmaamaha loogu talagalay qaadashada go'aanada saxda ah

- Waxay khuseysaa/khuseeyaa shirkadda oo dhan
- Waxaa arki kara shaqaalaha iyo dadweynaha
- Heerarka ugu sarreeya oo xitaa dhaafsan sharciga
- Isbeddelo aan joogto ahayn

# Siyaasadaha Goonida Ah

## Hagitaan qaas ah oo ku saabsan ficiladayada ku saleysan Xeerka Habdhaqanka

- Waxay khuseysaa/khuseeyaa shirkadda oo dhan
- Waxaa arki kara shaqaalaheena
- Wuxuu faahfaahin ka bixinayaa Xeerka
- Isbeddelo xilliyeed
- Tusaalooyinka waxaa ka mid ah Buug-gacmeedka Shaqaalaha, Siyaasadda Safarka Caalamiga ah iyo Kharashka iyo Qorshooyinka Sookoobka Faa'iidooyinka

# Hab-raacyada

## Nidaamyada hawlgalka ee loogu talagalay hawlo maalmeedka

- Waxay khusaysaa waaxda iyo/ama hawlaheeda
- Waxaa arki kara maareeyayaasha iyo waaxda shaqaalaha
- Way fahfaahsan yihiin, waxayna leeyihiin tilmaamo
- Isbeddelo joogto ah oo ku saleysan howgalada ganacsiga
- Tusaalooyinka waxaa ka mid ah habraacyada hawlgalka ee la jaangooyay iyo hagaha maareeyayaasha

# Ku hoggaaminta Qiyamyada

## Waxaan u heellannahay inaan ku noolaano qiyamkeena, inagoo samayneyna waxa saxda ah iyo anagoo u dhaqmayno si daacadnimo leh meel kasta oo aan ganacsi ku leenahay iyadoo aan la eegayn duruufaha.

Waxaa dhamaanteen mas'uuliyad naga saaran inaan u hoggaansano sharciga oo aan raacno Xeerka iyo siyaasadaha kale ee shirkadda. Haddii aad ku jebiso sharciga, Xeerkayaga ama siyaasadaha kale ee shirkadda, waxaa laga yaabaa inaad la kulanto tallaabo edbin ah oo ay ka mid noqon karto in lagaa ceyriyo shaqada, xitaa haddii jebintu ka dhacday meel ka baxsan dhismaha shirkadda ama saacad shaqo aysan jirin.

# Waajibaadka Dheeraadka ah ee Hoggaamiyeyaasha

## Dhammaan maamuleyaasha iyo hoggaamiyeyaasha sarsare waxay mas'uul ka yihiin abuurista jawi dhiirrigelinaya u hoggaansamida Xeerkayaga Anshaxa iyo siyaasadaha kale ee shirkadda.

Kormeerka habdhaqannada ganacsi ee mas'uuliyadda ku jirto waxay muhiim u yihiin kormeerka waxqabadka iyo natiijooyinka ganacsiga. Maamuleyaasha waxaa laga filayaa heer anshax oo sare, waxaana la filayaa inay dhowri doonaan heerarkaasi sare xitaa marka ay goobta ka maqan yihiin. Si aad nooga caawiso inaan kor u qaadno qiyamkayaga oo aan u ilaalino dhaqanka u hoggaansamida, waa inaad:

- noqoto tusaale lagu daydo kuna dhiirrigeli kooxahaaga inay u dhaqmaan si daacadnimo ku jirto wakhti kasta;
- dhiirrigeliso wadaxiriirka furan si shaqaaluhu inoo weydiiyaan su'aalo una muujiyaan walaacyada;
- hubiso inay kooxahaagu fahmaan oo ay raacaan Xeerka oo ay dhammeeyaan tababarka oo dhan;
- dhiirigelisaa jawi loo dhan yahay oo soo dhoweeya oo qiimeeya kala duwanaanshaha;
- si firfircoon u taageerto oo u raacdo Siyaasadda Ka Dhanka ah Aargoosiga;
- soo sheegtaa dhacdooyinka anshax-darrada ah ama xadgudubka imaan kara ee sharciga ama siyaasadda;
- marka ay habboon tahay, ka hadashaa hab-dhaqanka aan ku habboonayn Xeerka iyo qiyamyadayaga xilligaas iyo;
- inaad soo gudbiso warbixinnada oo aad caawimaad ka hesho Waaxda Shaqaaleynta ama Anshaxa Caalamiga & U Hogaansamida marka loo baahdo.

# Ka-dhaafitaannada

Xeerkayagu waxaa ansixiyay Guddigayaga Agaasimeyaasha. Raasumaalka Aadanaha iyo Guddiga Magdhowga ee Guddiga Agaasimeyaasha waa inay ansixiyaan ka-dhaafida wixii shuruud ah ee Xeerka maamule kasta oo haya jagada Madaxweyne Ku-xigeenka Sare iyo wixii ka sarreeya. Codsiyada kale oo dhan ee ku aadan ka dhaafitaanada Xeerka waa inuu ansixiyaa Sarkaalka Sare ee Sharciga. Ka-dhaafitaano kasta oo la oggolaaday waa inay qornaadaan.

# Hadal: Na Weydii Su'aalo oo Muuji Walaacyada

Xeerka ma saadaalin karo xaalad kasta, balse waad iska ilaalin kartaa dhibaatooyinka badankood adoo hubinaya Xeerka, adoo adeegsanaya maskax oo codsanayo caawimaad kahor intaadan wax ku dhaqaaqin. Waxaan kaa rajaynaynaa inaad si furan aad noogala hadasho arrimaha ku saabsan fikradaha, su'aalaha, dhibaatooyinka iyo waxyaabaha aad tabanayso ee shaqada la xiriira si loo xalliyo. Waxaan ku dhiirrigelinaynaa dhammaan shaqaalaha inay naga caawiyaan ilaalinta dhaqan ixtiraam iyo ka-qaybgal siman leh, iyagoo soo sheegaya tacaddiyada iyagoo adeegsanaya mid ka mid ah hababka warbixinta ee ay shirkaddu dejisay. Haddii aad ka welwelsan tahay xaalad shaqo la xiriirta, ama aad aragto wax aad u malaynayso inay khaldan yihiin, kala hadal maareeyahaaga, jaalkaaga Waaxda Shaqaalaha ama Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansanaanta Anshaxa, ama kala xiriir Khadka tooska ah ee Anshaxa barta bbw.ethicspoint.com.

## Fursad Waxbarasho

**Sideen ku ogaadaa goorta la raadsado hagis?**

**Isweydii:**

Ma jirtaa fursad ah in ficilkan yahay mid sharci-darro ah?

Miyuu khilaafsan yahay qiyamkayaga, Xeerkayaga ama siyaasadaha?

Ma loo qaadan karaa mid anshaxdarro ah ama aan daacad laga ahayn?

Ma dhaawici karaa sumcadda shirkadda?

Ma u baahanahay inaan helo oggolaansho si aan u sameeyo?

Tani ceeb miyay noqon doontaa ama ma u muuqan doontaa mid xun haddii laga sheego warbaahinta?

Haddii jawaabta mid ka mid ah su'aalahaan ay noqon karto "Haa," kala hadal arrinta maamulaha, shaqaalaha Waaxda Shaqaaleynta ama waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansamida Anshaxa.

# Faa'iidada Wadaxiriiradayada Furan

## Waxaan leenahay dhaqan guuleed oo ugu horreyn ku dhisan firfircooni iyo wadashaqeyn.

Waxaan aamminsannahay in aan leenahay wax-soo-saar badan, wax-ku-ool badan, iyo inaan awood fiican u leenahay inaan oofino ballanqaadkayaga marka danwadaagtayadu wadashaqayn fiican ka wada dhexeyso. Danwadaagtayada ayaa ku kobciyay xirfadahooda iyo meheraddaba iyo ganacsigooda madal iskaashi iyo wadashaqayn leh iyo iyagoo leh awoodda inay iskula shaqeeyaan si xor iyo toos ah midba midka kale. Iyadoo qeyb ka ah ballanqaadkayaga, danwadaagta waxaa loo ballanqaadayaa:

- fursadaha loo siman yahay iyo si siman ula dhaqanka;
- fursadaha horumarinta xirfadaha;
- mushaharro xaqsoor leh oo sarreeyo;
- faa'iidooyin sarreeyo;
- wadaxiriir furan oo daacad laga yahay; iyo
- jawi shaqo oo abaalmarin iyo ammaan leh.

# Waxaa naga go'an inaan ka dhabayno qiyamyadayada.

## Waxa dhacayo marka aad la xiriirto khadka tooska ah ee anshaxa?

Waxaad ku soo sheegi kartaa dhacdooyinka suuragalka ah ee anshax-darrada iyo jebinta shaciga ee imaan karta ama siyaasadaha shirkadda Khadka Anshaxa 24 saac maalintii, 7 maalmood Isbuucii.

Khadka Tooska ah ee Anshaxa waxaa ka shaqeeya dhinac saddexaad oo madax-banaan wuxuuna u oggolaadaa danwadaagta inay u soo sheegaan walaacyada si qarsoodi ah (marka sharcigu oggolyahay) waxayna bixiyaan adeegyo turjumaad si ay u taageeraan danwadaagta ku soogudbiyo warbixinnada luuqad aan Ingiriisi ahayn. Macluumaadka lagu soo wargeliyey Khadka Tooska ah ee Anshaxa waxaa kaliya lala wadaagayaa shuraakada joogta waaxaha u baahan inay ogaadaan, sida Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansanaanta Anshaxa, Waaxda Shaqaaleynta ama Waaxda Sharciga. Waxaa naga go'an inaan sameyno dib-u-eegista walaacyada lagu soo sheegay Khadka Furan ee Anshaxa oo caddaalad leh, degdeg ah oo, marka ay suurtagal tahay qarsoodi ah.

Wixii ah khadadka talefoonka ee khaaska ah ee ka jira wadamada aan ka shaqeyno, ama si aad warbixin u soo gudbiso onlayn, booqo bbw.ethicspoint.com.

## Aargoosasho

Lagu lama kici doono aargoosi, talaabo edbin ama wax khasaaro xaga xirfadda ah markaad muujiso walaac. Sida ku cad siyaasaddeena kahortagta Aargoosiga, dhammaan noocyada aargoosiga waa mamnuuc, oo ay ku jiraan nooc kasta oo edbin, aargoosi, cabsigelin, tallaabo shaqo oo xun ama khasaare taban oo xirfadeed ah oo sida macquulka ah ay u badan tahay inay qofka ka hor istaagto ka warbixinta anshax-darrada, ama nooc kale oo aargoosi ah oo ku lug leh ka qayb qaadashada hawl kasta oo uu dhowro sharciga.

Uma dulqaadano nooc kasta oo aargoosi ah oo ka dhan ah hawl kasta oo sharcigu dhowro. Dib ayaad u eegi kartaa Siyaasadda Kahortagta Aargoosiga tusaale ahaan hawlaha sharcigu dhowro. Danwadaagta sidoo kale waa ka mamnuuc inay ka aargoostaan shaqsi sheegay inuu damacsan yahay inuu walaac muujiyo sida ku cad Hagitaanka Ka Warbixinta Dhibaataynta, Takoorka iyo Aargoosiga. Danwadaag kasta oo ku kaca nooc kasta oo aargoosi ah oo ka dhan ah shaqsi kasta oo: (a) soo gudbiya warbixin isagoo u marayo goob kasta oo warbixineed ama muujiyo inuu rabo inuu sidaasi sameeyo; (b) bixiya macluumaadka ku saabsan warbixin; ama (c) baaro warbixinta, waxaa lagu qaadi doonaa anshax-marin oo aan ku koobnayn balse ay ku jiraan joojinta iyo dib u bixinta lacagaha magdhowga ama baabi'inta ikhtiyaarada aan weli bislaan.

Maamule ama kormeere kasta, xitaa hadduu si kumeel gaar ah ugu shaqaynayo, oo aaminsan in laga aargoosanayo waa inuu soo sheego habdhaqanka. Haddii aad tahay danwadaag, iibiye, qandaraasle ama shuraako kale oo ganacsi oo aad aaminsan tahay in lagaa aargoosanayo ama aad aragtay aargoosi, fadlan u gudbi warbixin Waaxda Shaqaalaha ama Waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa.

### Fursad Waxbarasho

**Goormee ayaan soo sheegaa tuhunka ku xadgudubka Xeerka?**

Isla marka aad ka war hesho.

**Ka waran haddii aanan hubin in xaalad ama dhacdo ay ku xadgudbeyso Xeerka?**

Waa inaad la hadashaa maareeyahaaga, jaalkaaga Waaxda Shaqaalaha ama Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa ama la xiriir Khadka Tooska ah ee Anshaxa. Way fiican tahay inaad ka hadasho walaac ku saabsan dhibaato imaan karta intaad sugi laheyd oo khatar uga imaan laheyd dadka kale ama shirkadda. Laguuma ciqaabi doono inaad soo gudbisay warbixin ku salaysan macluumaad aad aaminsan tahay inuu run yahay—-xitaa haddii ay cadaato inaad khaldan tahay.

**Ka waran haddii maamuluhu i weydiisto inaan sameeyo wax aan u arko sharci-darro ama jebinayo Xeerka Anshaxa ama siyaasadaha kale ee shirkadda? Maxaan sameeyaa?**

Haddii ay suurtagal tahay, waa inaad marka hore walaacyadaada si furan oo daacadnimo ah oogala hadashaa maamulahaaga. Haddii aadan ku qanacsaneyn jawaabta maamulahaaga ama aadan ku qanacsaneyn inaad la hadasho maamulahaaga, waa inaad raadsataa maamule heerka xiga ah ama shaqaalaha Waaxda Shaqaaleynta. Haddii taasi aysan macquul ahayn ama haddii aadan ku raaxaysanayn inaad si toos ah ugu tagto maamulahaaga, maamulaha heerka xiga ah ama Waaxda Shaqaaleynta, waa inaad ugu soo sheegto arrinta Khadka Tooska ah ee Anshaxa ama Anshaxa Caalamiga & U hoggaansamida Anshaxa barta Ethicsandcompliance@bbw.com. Waa inaadan waligaa si ogaal ah u jebinin Xeerkayaga ama siyaasadayada-—xitaa haddii maamule kugu amro inaad sidaasi sameyso.



# Daacadnimada

## Waxaa naga go'an daacadnimada goobta shaqada. Waxaan mamnuucnaa xatooyada, khayaanada ama si ula kac u sheegida war been ah ama marin habaabin ah.

Waxaan sidoo kale u tixgalinaa waxyaabaha soo socda inay yihiin anshax-darro lagu muteysan karo talaabo edbin: inaad ka been sheegto diiwaanada iyo dukumentiyada shirkada (oo ay ku jiraan diiwaanka waqtiga, gunnada ama kharashka), si ula kac ah u qarinta macluumaad, si khaldan ugu isticmaalida adiga ama qof kale danihiina dhismaha iyo hantida shirkadda, ku xadgudubka ama ku takrifalka kaararka lacagaha ama koontooyinka shirkadaha iyo ku takrifalka qiimo-dhimista badeeco aad sameyso.

# Diiwaangelinta Waqtiga

## Waxaan raacnaa dhammaan sharciyada iyo xeerarka khuseeya gunnada iyo saacadaha shaqo.

Waxaa naga go'an inaan si buuxda ugu hoggaansano dhammaan shuruucda iyo xeerarka mushaarka iyo saacadaha, oo ay ku jiraan shaqooyinka dheeraadka ah, maalmaha nasashada, mushaarka waqtiga dheeraadka ah, mushaar joojinta, shuruudaha mushaarka ugu yar, gunnooyinka iyo saacadaha carruurta aan qaangaarin iyo habdhaqannada kale ee gunnada iyo saacadaha shaqada. Waxay ka soo horjeedaa sharciga waana xadgudub ka dhan ah Xeerkayaga inaad shaqeysid magdhow la'aan ama in kormeere kaa codsado inaad shaqeyso bilaa magdhow la'aan. Waa inaad u soo sheegtaa wixii xadgudub ah ee ku saabsan jebinta sharciyadda iyo siyaasadaha gunnada iyo saacadaha Waaxda Shaqaaleynta ama waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansamida.

# Caafimaadka iyo Badqabka Goobta Shaqada

## Waxaan bixinaa xarumo ammaan ah oo nadiif ah oo loogu talagalay macaamiishayada iyo danwadaagtayada.

Waxaan u hoggaansanaa dhammaan sharciyada badqabka goobta shaqada ee la dabaqi karo waxaana leeanahy siyaasado iyo habraacyo badqab oo caalami ah si ay nooga dhowraan dhaawaca goobta shaqada ee la iska ilaalin karo. Waa inaad u hoggaansantaa dhammaan sharciyada iyo siyaasadaha caafimaadka iyo badqabka oo aanad marnaba iska indhatirin walaacyada caafimaadka ama badqabka ee laga yaabo inay jiraan. U soo sheeg maamulahaaga wixii halis ah ee soo kororta isla markaana si degdeg ah ugu soo sheeg shil, jirro ama dhaawac kasta oo shaqada la xiriira oo jira, haba yaraadee, iyadoo la raacayo habraaca shirkadda ee dalkaaga. Intaa waxaa dheer, ku wargeli dhacdooyinkaan Xarunta Hawlgallada Degdega ah(emergencyoperationscenter@bbw.com).

# Lama Oggola Rabshada Goobta Shaqada; Lama Oggola Hub ama Qoryo

## Waxaan si dhab ah u qaadanaa rabshada iyo hanjabaadda leh rabshada.

Haddii aad hanjabto ama waxyeello u geysato cid, waa lagu ceyrin doonaa iyadoo aan loo eegin in hanjaabaada la geystay xilli shaqada lagu jiray ama aan lagu jirin, "kaftan" ahaan ama "xamaasad kaa keentay." Intaas waxaa sii dheer, uma oggolaanayno danwadaagtu inay hub iyo qoryo ku dhex qaataan dhismaha shirkadda ama dukaamadayada.

# Fursad Loo Siman Yahay

## Waxaan nahay shaqaaleysiiye bixiyo fursado loo siman yahay.

Ma gaarno go'aano shaqo oo ku saleysan jinsiyadda, midabka, diinta, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, asal qarameedka, muwaadinnimada, da'da, naafonimada, nooca galmada, xaaladda guurka, uurka, macluumaadka hido-side, xaaladda Halyeynimo ee la dhowro ama xaalad kasta oo kale oo sharci ahaan la dhowro oo shaqsigu leeyahay, waxaana u hoggaansannaa dhammaan sharciyada khuseeya habdhaqamada shaqaaleysiinta eex la'aanta ah. Waxaa naga go'an inaan u fidino diyaafeyn macquul ah danwadaagta iyo shaqo codsadeyaasha naafada ah. Kooxdayada maaraynta waxay u heellan yihiin inay xaqiijiyaan fulinta siyaasaddan marka la eego qorida, shaqaalaynta, meelaynta, dallacsiinta, beddelka, tababarka, magdhowga, macaashyada, hawlaha danwadaagta iyo daawaynta guud inta lagu gudajiro shaqada.



# Kahortagga Faraxumaynta

Uma dulqaadano faraxumaynta noocay doontaba ha ahaatee. Waxaa naga go'an inaan ilaalino jawi shaqo oo ka madax-banaan oo xor ka ah dhammaan noocyada faraxumaynta, ha ahaato dhibaateyntaas mid ka dhalatay jinsiga dhabta ah ama loo qaateenka ah (oo ay ku jiraan uurka, dhalmada, naasnuujinta/nuujinta ilmaha ama xaalad caafimaad oo la mid ah), nooca galmada (oo ay ku jiraan jinsiga qumman, khaniisnimada, iyo laba-jinsiilenimo), aqoonsiga jinsiga (oo loola jeedo waxa qofka aaminsan yahay inuu jinsigiisa yahay, ama aragtida aqoonsiga jinsiga ee qofka, taasoo ay ku jiri karaan lab, dhedig, laba-jinsile, jinsi-laawe, jinsi ka duwan midka qofka loo nisbeeyay xilliga dhalashada, ama sinji-guur), ama muujinta jinsiga.

Marka loo eego siyaasaddayada kahortagta dhibaatavnta galmada, "faraxumaynta" waxaa loola jeedaa dhammaan galmooda iyo habdhaqanada galmada ku salaysan ee aan la rabin, waxaana ku jira 5 qaybood oo muhiim ah oo anshax-xumo ah:

1. Is qadimidda qalmo, dareenka, ama faallooyinka soo noqnoqda ee aan la rabin;
2. Galmada khasabka ah, taasoo loola jeedo dareenka galmo ee aan la rabin oo lagu kabay hanjabaad ama laaluush oo la xiriira shaqada;
3. Faraxumaynta galmada la xiriirta, taasoo ku lug leh habdhaqan kasta oo aan la rabin oo lagula kaco shakhsiga iyadoo ugu wacan jinsiga qofkaas. Galmada waxaa lagu qeexaa inay ku jiraan nooca galmada, jinsiga qofku isku aqoonsan yahay ama jinsiga loo qaateenka ah, aqoonsiga jinsiga, muujinta jinsiga, ama heerka sinji-guurnimo;
4. Dhibaataynta ku salaysan fikradaha khaldan ee laga aaminsan yahay jinsiga, ee dhaca marka dabeecadda ama habdhaqanka shakhsiyeed ama dabeecadda loo arko inay yihiin kuwo aan habboonayn iyadoo sababtuna tahay inaysan waafaqsanayn fikradaha dadka kale ee ku saabsan sida shakhsiyaadka jinsi kale leh ay tahay inay u ekaadaan ama u dhaqmaan. Fikradaha khaldan ee laga aaminsan yahay jinsiga ayaa sidoo kale dhaca marka habdhaqanka dhibaataynta uu ku salaysan yahay male-awaalka ku saabsan mas'uuliyadaha qofka ka saaran qoyska, sida u qaadashada in haweenku yihiin daryeelayaasha aasaasiga ah oo aabayaashu ay tahay inaynan qaadan fasax waalidnimo; iyo
5. Dhibaataynta ku salaysan uurka, dhalmada, ama xaaladaha caafimaad ee la xiriirta ee shaqsiga, oo ay ku jirto naasnuujinta.

Faraxumaynta waxay sidoo kale abuuri kartaa jawi shaqo oo cadowtinimo leh marka:

- u hoggaansamida habdhaqanka noocan ah in si cad ama si daahsoon loogu muujiyo shuruudda ama xaaladda shaqo ee shaqsiga; ama
- u hoggaansamida ama diidmada habdhaqanka noocan ah in loo adeegsado in aasaas looga dhigo go'aannada shaqo ee saameeya shakhsiga; ama
- Habdhaqnka noocaan ah wuxuu si aan macquul ahayn u faragaliyaa waxqabadka shaqo ee shakhsiyeed ama waxay abuurtaa jawi shaqo oo cabsi-gelin, colaad ama weerar ah.

Faraxumaynta uma baahna inay noqoto mid daran ama qalqaalo ah si loo jebiyo siyaasadayada; waxay noqon kartaa habdhaqan kasta oo dhibaatayn ah oo ka kooban wax ka badan dhib yar ama carqalad yar. Waxaa intaas dheer, xitaa habdhaqanka u muuqda mid aan waxyeello lahayn marka keligeed dhacdo ayaa noqon karta jawi shaqo oo cadaawad abuuri karo waqti kadib.

Faraxumaynta waxay ka dhex dhici kartaa dadka lab iyo dhedig ah ama jinsi kasta leh; danwadaagta isku heerka shaqo ah ama danwadaagta heerarka shaqo ee kala duwan; danwadaagta isku shaqada ah iyo iibiyeyaasha; ama danwadaagta iyo macaamiisha. Mamnuucideena ka dhanka ah dhibaataynta waxay sidoo kale khusaysaa xaaladaha ganacsiga ee aan rasmiga ahayn iyo munaasabadaha shirkadda ay maalgaliso, oo ay ku jiraan xafladaha iyo safarada shirkadda.

# Ilbaxnimada, Kahortagga Takoorka iyo Dhibaataynta Kale

## Waxaa naga go'an inaan ilaalino jawi shaqo oo ka madax banaan dhammaan noocyada takoorka iyo dhibaateynta.

Waxaan mamnuucaynaa dhammaan noocyada takoorka iyo dhibaataynta ku salaysan iskirka dhabta ah ama loo qaateenka ah (oo ay ku jiraan sifooyinka qowmiyadeed ee taariikh ahaan la xidhiidha jinsiyadda, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, nooca timaha iyo qaababka qurxinta timaha ee la dhowro), caqiidada (oo ay ku jiraan caqiidada diimeed, ilaalinta iyo ku dhaqanka diinta, iyo labbiska ama dhaqamada isqurxinta), midabka, jinsiga (oo ay ku jiraan jinsiga qumman, khaniisnimada iyo laba-jinsiilenimada), aqoonsiga jinsiga (waxaa loola jeedaa sida qofku u arko inuu yahay jinsigiisa, ama aragtida qofka ee aqoonsiga jinsigiisa, taasoo ay ku jiri karaan labka, dheddigga, dheddig-labood, jinsi-laawe, jinsi ka duwan midka qofka loo aqoonsaday xilliga dhalashada, ama sinji-guur), muujinta jinsiga, diinta, asal qarameedka, abtirka, qowmiyadda, muwaadinimada, heerka halyeeyga, macluumaadka hiddaha ama sifo kasta oo kale oo lagu ilaaliyo sharciga federaalka, gobolka ama deegaanka.

Siyaasaddani waxay khusaysaa dhammaan danwadaagta, dadka kale ee aan sida caadiga ah loo qeexin inay yihiin danwadaag, sida shaqo codsadayaasha, shaqaalaha ku jira carbiska shirkadda iyo kuwa shirkadda ka baxsan (haddii ay qaataan mushaar ama haddii aysan aqaadan), tababareyaasha, qandaraasleyaasha madax-bannaan, qandaraasle-hoosaadyada, shaqaalaha kumeelgaarka ah iyo la-taliyayaasha. Nidaamkani wuxuu sidoo kale khuseeyaa dhammaan macaamiisha, iibiyeyaasha, qandaraaslayaasha, shuraakada ganacsi ee jira ama suurtagalka ah, iyo dhinacyada kale ee saddexaad marka ay ganacsi nala sameynayaan ama ay joogaan dhismayaasheena. Waxaan sidoo kale filaynaa in si ixtiraam ah loola dhaqmi doono iyo inay u dhaqmaan qaab la jaanqaadaya habdhaqankeena ixtiraamka leh.

Uma dulqaadano habdhaqanka takoorka ama dhibaataynta leh. Tusaaleyaasha waxaa ka mid ah:

- faallooyinka, aflagaadada, sawir-gacmeedyada, kaftanada, iimaylada, qoraalada, waxyaabaha la soo geliyo bulshada, ama wadaxiriirada kale oo ay ku jiraan macluumaadka loogu talagalay sharaf-dilka, aflagaadada ama macluumaadka naxariis-darrada leh ama malawaalka ah oo khuseeya xaaladda sharcigu dhowro ee shakhsiga ee hoos timaada sharciyada la dabaqi karo; iyo
- ka qayb qaadashada markii dad kale ay dhibaateynayaan ama midabtakoorayaan qof kale.

Takoorka ama dhibaateynta ka sokow, u dhaqanka si aan il-baxnimo ku jirin iyo xoog-sheegashada ayaa ah nooc kale oo habdhaqan xushmad-darro ah ama habdhaqan aan habboonayn oo u dhaxeysa dhacdooyin yaryar iyo kuwa culus oo aan loo dulqaadan doonin. Xoog-sheegashadu waxay ku lug leedahay ficillo soo noqnoqda oo loogu talagalay cabsi gelin, dhibaateyn, bahdilaad ama ku xumeyn. Xoog-sheegashadu waxay noqon kartaa mid hadal ah, mid aan hadal ahayn, mid maskaxiyan ah, ama mid jireed. Si loo bixiyo tusaalooyin, waxaa halkan ku yaala tusaalooyinka xoogsheegashada ee wiiqa ballanqaadkayaga ah inaan qof walba ula dhaqanno si sharaf iyo xushmad leh:

- yasida shaqo-wadaage, gaar ahaan dadka kale hortooda;
- weeraro shaqsiyeed (ku xanaaqid, magac-ugu-yeerid) iyo wixii la mid ah);
- cabsi gelin muuqata;
- ku dhiirrigelinta dadka kale inay ka soo horjeestaan ama “isugu tagaan” shaqo-wadaage ama koox shaqo-wadaag ah oo la bartilmaameedsaday;
- ku cadaadinta qof inuu sameeyo ama sheego wax uusan rabin;
- dabeecadda hadalka ah, hadalka ahayn, muuqaalka ah ama muuqata ee qofka kale ka dhigaysa inuu dareemo cabsi, xanaaq ama raaxo-darro;
- hadalada meel ka dhaca ah;
- kharribida wax-soo-saarka shaqo oo qof kale ama si ula kac ah u wiiqida waxqabadka shaqo ee qofka; iyo
- dabeecad xaasidnimo, cadaawad ama afxumo leh.

Shaqaalaha waxaa ka mamnuuc ah inay ku kacaan dhaqan loo arki karo handadaad, takoorid, ama si kale oo ixtiraam-darro ugu ah shaqaale kale, macmiil, iibiye, qandaraasle, ama la-hawlgal ganacsi iyagoo adeegsanaya hab elektaroonig ah, xitaa marka aysan shaqada ku jirin ama aysan joogin goobta shirkadda.

# Hagitaanka ka Warbixinta Dhibaataynta, Takoorka iyo Aargoosiga

## Haddii lagugu sameeyo habdhaqan kasta oo aad aaminsan tahay inuu ku xadgudbay Siyaasadda Kahortagta Faraxumaynta, Ilbaxnimada, Habraacyada iyo Siyaasadaha Kahortagga Takoorka iyo Dhibaataynta Dadka Kale, Siyaasadda Aargoosiga ee shirkadda ama siyaasad kale, ama aad aragto fal kasta oo noocaas ah, waa inaad si degdeg ah u soo sheegto habdhaqanka.

Waxaad la hadli kartaa, warqad ama iimayl u qori kartaa ama la xiriiri kartaa kormeerahaaga tooska ah ama, haddii habdhaqanku ku lug leeyahay kormeerahaaga tooska ah, maamule kale ama kormeere kale; Waaxda Shaqaalaha, Waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hogaansanaanta Anshaxa, ama Khadka Tooska ah ee Anshaxa.

Kormeerayaasha iyo maareeyayaasha — xitaa kuwa si ku-meel-gaar ah xilkaas u haya — waxaa saaran waajib ah inay soo sheegaan dhibaatayn galmo ama dhibaatayn kale, takoorid, aargoosi, ama anshax-xumo kale oo ay arkaan ama loo soo sheego. Kormeerayaasha iyo maareeyayaasha waa inay dhaqankaas ama cabashadaas u gudbiyaan la-hawlgalahooda Waaxda Shaqaalaha ama Qaybta Anshaxa iyo U Hoggaansanaanta Caalamiga ah si shirkaddu u baarto una qaaddo tallaabo saxitaan ah, haddii ay habboon tahay.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka warbixinta walaacyada iyo geedi-socodka baaritaanka adigoo dib-u-eegis ku samaynaya Hagitaanka Ka Warbixinta Dhibaataynta, Takoorka iyo Aargoosiga.

# Goob Shaqo oo Xor ka ah Mukhaadaraadka iyo Qamriga

## Waxaan ballanqaadeynaa inaan bixino goob shaqo oo xor ka ah-mukhaadaraadka iyo khamriga.

Waa inaad shaqeysaa gebi ahaanba adigoo cabsaneyn khamri iyo mukhaadaraadka sharci-darrada ah, iyo qabin waliba saamaynada daran ee walxo kasta oo kale oo sharci ah. Ma ku iibin, lahaan, qeybin, isticmaali ama iibsan kartid daroogooyin sharci-darro ah–-ama ma ku iibin, wareejin ama qeybin kartid daawooyinka laguu qoray–-dhismaha shirkadda ama saacadaha shaqada lagu jiro. Ma imaan kartid shaqada ka dib markaad soo cabto khamri ama daroogo sharci-darro ah. Tusaale ahaan, qaddo intaad u baxdo, khamri ma soo cabbi kartid, dabadeedna kuma soo noqon kartid shaqada. Shirkaddu waxay qaadatay Siyaasadda Khamriga ee Danwadaagta Caalmiga ah taasoo ka hadlaysa isticmaalka khamriga xilliyada ay dhacayaan xafladaha shirkadu ay maalgeliso ama marka lagu gudajiro ganacsiga shirkadda.

# Iskaashi la Yeelashada Alaab-qeybiyeyaasha Mas'uulka ah

## Waxaan raadinaa inaan keliya iskaashi la sameyno alaab-qeybiyeyaasha aan wadaagno qiyamkayaga iyo ballanqaadkayaga habdhaqanada anshaxa iyo mas'uuliyadda ganacsi leh.

Waxaan si xooggan u aaminsanahay in tayada badeecadayada ay ku bilaabato si fiican ula dhaqanka dadka sameeya baddeecadahayaga. Sababtaas awgeed, waxaan haynaa Buug-tilmaameedka Xeerka Anshaxa iyo U Hoggaansamida Anshaxa ee Alaab-qeybiyaha kuwaasoo tilmaamaya halbeegyadayada loogu talagalay alaab-qeybiyeyaasha. Inkastoo aan aqoonsannahay inay jiraan deegaano sharciyo iyo dhaqanno kala duwan leh inay ku shaqeeyaan alaab-qeybiyeyaasheena ku sugan adduunka oo dhan, waxaan fileynaa in alaab-qeybiyeyaashu u hoggaansamaan heerarka sare ee Bath & Body Works si ay noola ganacsadaan. Bath & Body Works si ula kac ah ulama shaqeyn doonto alaab-qeybiyeyaasha ku hawlan nooc kasta oo ka mid ah addoonsiga casriga ah ama aan dooneynin inay go'aansadaan ama u hoggaansamaan halbeegyadeena alaab-qeybiyeyaasha.

# Mas'uuliyadda Deegaanka

## Waxaan aaminsannahay inay sameyno waxa saxda ah ee ka jira ganacsigayaga, bulshadayada iyo adduunkayaga.

Waxaan u hoggaansannaa dhammaan sharciyadda deegaanka ee la dabaqi karo waxaana u qabanaa ganacsigayaga qaab deegaanka ku habboon, si aan u yarayno saameynta aan ku leenahay deegaanka.

# Tayada Baddeecada

## Waxaan ku faanaa tayada iyo daacadnimada baddeecooyinkeena.

Waxaan ku dadaalnaa inaan iibino baddeecooyin tayo sare leh oo u hoggaansama dhammaan sharciyada badqabka baddeecada ee lagu dabaqi karo.

# Ganacsiga Caalamiga

## Waxaan u hoggaansannaa sharciyadda iyo qawaaniinta soodejinta iyo wax dhoofinta.

Dalalku waxay soo rogi karaan cunaqabateyo iyo xaddidaado dhaqaale oo la xiriira heshiisyada ganacsi oo lala yeesho dalal gaar ah, dhinacyada dhaqaalaha, hay'adaha ama shakhsiyaadka muhiimka ah. Xakameynta waxyaabaha la dhoofiyo ee saaran wax dhoofinta ama u kala gooshida alaabaha ama tiknoolajiyadda la xayiray gudaha wadanka ayaa sidoo kale caam ah. Waxaan u hoggaansanaa dhammaan cunaqabateynada dhaqaale iyo sidoo kale sharciyadda xakameynta dhoofinta ee khuseeya ganacsigayaga oo kama qaybqaadanno qaadacaadaha uusan Mareykanku taageerin.

# Lacag Dhaqida

## Waxaan u hoggaansannaa dhammaan sharciyadda la dabaqi karo ee la xiriira lacag dhaqida.

Lacag dhaqida waa hannaan lagu sameeyo lacag ama dakhli si fal dembiyeed ah, sida ka ganacsiga daroogada ama maalgelinta argagixisada, taasoo u muuqato inay ka timaado ilo sharci ah. Lacagta fal dembiyeedka lagu helay ayaa sidoo kale ku jirta noocyada raasumaalka, hantida ma guurtada ah iyo hantida aan muuqan ee lagu helay fal dembiyeedka.

# Iska Hor Imaadka Danaha

## Waxaan ka fogaanaa Iska Hor Imaadka Danaha.

Iska hor imaadka danaha ayaa ah hawl kasta, oo ay ku jirto dan maaliyadeed ama xiriir shaqsiyeed ama xirfadeed oo farageliya–- ama u muuqda inuu faragelinayo–-awoodda aad u leedahay inaad gaarto go'aano ujeeddo leh adoo metelaya shirkadda. Isku hor imaadka danaha waxay halis u abuuraan shirkadayada, oo dhamaanteen waxaa waajib naga saaran inaan iska ilaalino xaaladaha halista abuuri kara – ama xitaa u muuqda inay abuuri karaan – iska hor imaadka danaha. Ficilladaada, danahaaga maaliyadeed ama ganacsi ama xiriirradaada ayaa laga yaabaa inay abuuraan Iska Hor Imaadka Danaha. Waa inaad soo sheegtaa iska hor imaadka danaha ee imaan kara ee qaybta ka ah geedi-socodka sahanka sannadlaha ah aadna ugu soo sheegtaa markay soo baxaan maamulahaaga, jaalka Waaxda Shaqaalaha ama waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansamida barta EthicsandCompliance@bbw.com. Anshaxa & Hoggaansanaanta Guud waxay la shaqayn doonaan adiga, maamulahaaga, iyo jaalkaaga Waaxda Shaqaalaha si ay gacan uga gaystaan maaraynta ama fududaynta wixii khilaaf jira, iman kara ama la dareemo.

Waa in aadan weligaa u adeegsan hantida, macluumaadka shirkada ama jagada aad ka hayso Bath & Body Works dano shaqsiyeed. Waa inaadan weligaa la loollamin shirkadda, ama isla ganacsiga shirkadda adoo sameynaya ama adoo dhaafinaya fursad kasta oo iibinta ama iibsiga baddeecooyinka, adeegyada ama danaha midkoodna. Xaaladaha ku lugta leh iska hor imaadka danaha had iyo jeer ma ahan kuwo iska cad ama si fudud lagu xallin karo. Qaybtani waxay sharraxaysaa qaar ka mid ah duruufaha ugu badan qaarkood ee laga yaabo inaad la kulanto ee ayna tahay inaad soo sheegto hadday soo baxaan.

## Danaha Dhaqaale

Iska hor imaadka danaha ayaa dhici kara marka go'aankaagu saameyn karo–-ama u muuqdo inuu saameyn karo–-faa'ido dhaqaale oo shaqsiyadeed oo suurtagal ah. Tusaale ahaan, haddii aad dano dhaqaale ka leedahay shirkad ganacsi la sameeyso Bath & Body Works oo doorkaagu si toos ah ama dadban ugu lug leeyahay shirkadaas, waxaa laga yaabaa inay dhacaan iska hor imaadka danaha. Haddii aad dano dhaqaale ka leedahay alaab-qeybiyaha kuwaasoo sababi kara iska hor imaad daneed, waa inaad u sheegto maamulahaaga ama waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansamida Anshaxa si ay markaa u kaalmayn karaan una go'aamiyaan maarayn habboon.

## La Shaqeynta Xubnaha Qoyska iyo Saaxiibada Dhaw

Haddii aad la shaqeysid xubin qoyskaaga ah ama qof kasta oo aad xiriir dhow la leedahay, xiriirku wuxuu horseedi karaa muuqaal eex. Iyadoo la eegayo ujeeddada laga leeyahay siyaasadan, "xiriirka dhow ee shakhsiyeed" waxaa ka mid ah (laakiin kuma xaddidna) afadaada ama seygaaga, lammaanahaaga, qaraabadaada (dhiig, guur ama korsasho wadaagtaan), qofka aad isjeceshihiin ama xiriir galmo leedihiin, ama dadka aad la nooshahay. Waa inaad ku soo sheegtaa xiriir kasta oo dhow oo shaqsiyeed oo aad la leedahay qof kasta warbixinta aadu soo gudbinayso Waaxdaada Shaqaalaha ama waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansamida Anshaxa. Intaas waxaa sii dheer, waxaa laga yaabaa inaadan ku lug lahaan karin wax go'aannada la xiriira shaqaaleynta, magdhowga, qiimeynta ama xayeysiinta qof kasta oo aad xiriir dhow la leedahay. Xitaa haddii aadan rumaysnayn inaad "xiriir shakhsiyeed oo dhow" la leedahay shaqaale kale oo u baahan in la shaaciyo, haddii aad aragto ama ogaato inay jirto tuhun eex ama dhinac u janjeerid ah, waa inaad la xiriirtaa la-hawlgalahaaga Waaxda Shaqaalaha ama Qaybta Anshaxa iyo U Hoggaansanaanta Caalamiga ah si aad taageero u hesho.

Maamuleyaasha haya jagooyinka Madaxweyne Ku-Xigeenka Sare iyo wixii ka sarreeya ma la sameyn karaan xiriir jacayl ama xiriir dhow danwadaagta kale. Sidoo kale, haddii adiga ama qof kasta oo aad xiriir dhow la leedahay uu u shaqeeyo alaab-qeybiye, macmiil ama tartame, isla markiiba ogeysii maamulahaaga iyo Waaxdaada Shaqaalaha oo ha ka qeybqaadan go'aan qaadasho kasta oo la xiriirta dhinaca saddexaad. Ha u isticmaalin jagada aad ka hayso Bath & Body Works si aad saameyn ugu yeelatid hannaanka qandaraaska ama gorgortan kasta oo uu ku lug leeyahay qof aad adigu la leedahay xiriir dhab ah ama la dareensan yahay oo shaqsiyeed oo dhow.

## Shaqada Dibada ah

Iyadoo Bath & Body Works ay aqoonsan tahay in hawlwadaagayaasha qaarkood ay yeelan karaan ganacsi u gaar ah ama ay ka shaqeyn karaan shaqooyin labaad, waa in aadan weligaa ka bixin wax shaqo ah oo ka baxsan shirkadda ama hawlaha kale ee faragelinaya mas'uuliyadaada hawlwadaagta Bath & Body Works, ku xiran isticmaalkaaga hantida shirkadda, ku xadgudbaya qarsoodigaaga ama waajibaadyada kale ee shirkadda ama kaaga baahan inaad alaab ka keento shirkadda. Hawlwadaagayaasha waa in aysan u shaqayn alaab-qeybiye haddii ay si toos ah ama si dadban saameyn ugu leeyihiin ganacsiga alaab-qeybiyaha uu la leeyahay Bath & Body Works. Haddii aad ka qabto wax su'aalo ah inaad shaqo ku qabato bannanka inay abuuri karto isku-dhac suurtagal ah, la xiriir Waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa si laguu hago.

## Xubinimada Guddiga iyo Hawlaha Siyaasadeed ee Gaarka ah

Kahor intaadan aqbalin jago aad ku metesho guddiga agaasimeyaasha ee faa'ido-doonka ah ama sarkaal dawladeed ahaan, raadso oggolaanshaha waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hogaansamida Anshaxa si loo hubiyo in wax iska hor imaadka danaha ah aysan u jirin iyo in metelaadu aysan saameyn doonin awoodda aad u leedahay inaad qabato shaqadaada. Haddii aad doorato inaad si shaqsiyan ah ugu lug yeelato geedi-socodka siyaasadeed adoo ka shaqeynaya olole siyaasadeed ama waxqabad la mid ah, waxaad sameyn kartaa sidaas keliya markaad firaaqo tahay adoo isticmaalaya lacagtaada ama kheyraadkaaga. Uma fasaxnid inaad metesho shirkadda ama inaad u isticmaasho kheyraadka ama adeegyada shirkadda hawlo siyaasadeed oo shaqsiyeed.

# Fursad Waxbarasho

**Sideen ku ogaan karaa inuu iska hor imaadka danaha jiro?**

**Isweydii:**

Miyay danaha shirkadda ka baxsan leeyihiin saameyn–-ama u muuqdaan kuwo saameyn ku leh–-awoodda aan u leeyahay inaan gaaro go'aano ganacsi oo sax ah?

Miyaan shaqsiyan ka faa'iideysan doonaa ku lug lahaanshahayga xaaladda? Miyuu saaxiib ama qaraabo ka faa'iidi doonaa?

Kaqeybgalkayga hawshan ma carqaladeyn kartaa awooda aan u leeyahay inaan qabto shaqadeyda?

Miyaan u isticmaali doonaa hantida shirkadda dan shaqsiyeed?

Haddii xaalku noqdo mid caam ah, miyaan ku ceeboobi doonaa? Miyay ceeb ku tahay shirkadda?

Haddii jawaabta wax ka mid ah su'aalahan ay tahay "haa" ama "ma garanayo," ka raadso hagitaan Anshaxa & Hoggaansanaanta Guud.

**Alaab-qeybiyaha Bath & Body Works ayaa iga codsaday inaan la-taliye u noqdo saacadaha aanan shaqada kujirin. Miyaan sameyn karaa?**

Ma sameyn kartid bilaa ansixin. Ugu shaqaynta la-taliyenimo shirkad kale taasi oo shaqo ka dhaxayso Bath & Body Works waxay abuuri kartaa isdiidooyin daneed. U sheeg arrinta maamulahaaga ama Global Ethics & Compliance.

**Seedigey ayaa ku habboonaan lahaa booska shaqo ee ka bannaan kooxdayada. Miyay shirkadu shaqaaleysiin kartaa iyaga?**

Haa, shirkaddu waxay shaqaalayn kartaa seedigaa haddii uu noqdo qofka ugu habboon shaqada kadib markuu maray hannaanka codsiga iyo waraysiga shaqada ee caadiga ah. Waad kula talin kartaa shirkadda, laakiin waxa waajib ah inaad ka cudurdaarato hannaanka go'aan-qaadashada waana inaadan raadin inaad si uun saamayn ugu yeelato natiijada go'aanka ee shaqaalaynta.

**Elizabeth iyo Dave way is shukaansadaan waxayna labadooduba u shaqeeyaan shirkadda, laakiin waxay joogaan goobo kala duwan. Maadaama aysan wadashaqeynin, weligood qofna uma aysan sheegin xiriirkooda. Dhowaan, Dave waa la dallacsiiyay wuxuuna u wareegay goobta Elizabeth. Maxay tahay inay sameeyaan?**

Dave iyo Elizabeth waa inay u sheegaan xiriirkooda Waaxda Shaqaalaha iyo Anshaxa & Hoggaansanaanta Guud. Elizabeth iyo Dave midkoodna kuma lug lahaan karo go'aannada la xiriira magdhowga, macaashyada, qiimeynnada ama dallacsiinta qofka kale. Xitaa haddii aysan si toos ah isugu xirnayn xagga warbixinta shaqada, Dave iyo Elizabeth waa inay shaaciyaan xaaladda si Waaxda Shaqaalaha iyo qaybta Anshaxa & U Hoggaansanaanta Guud ay u qiimeeyaan xaaladda una go'aamiyaan haddii ay jiraan tallaabooyin gaar ah oo la qaado si loo maareeyo loona yareeyo aragti kasta oo suurtagal ah oo ah isdiidooyin daneed oo ka dhalan kara inay ka wada shaqeeyaan isla goobta.



# Tartanka iyo Heshiiska Cadaaladda leh

## Waxaan u tartannaa si xooggan balse caddaalad iyo anshax leh.

Kuma kacno habdhaqano ganacsiyeed oo caddaalad-darro ama been-abuur ah si toos ama si dadban midkoodna iyadoo aan u marayno dhinac saddexaad si ay u caawiyaan ganacsigayaga ama waxyeello ugu geystaan ganacsi tartan nagula jiro. Waxaan leenahay Siyaasad Lid ku ah Kalsoonida (Kahortagga Tartanka Aan Cadaalada Ahayn) taasoo xoojinaysa u heelanaantayada ah inaan u hoggaansanno dhammaan sharciyada tartan, heshiiska caddaaladda ah iyo sharciyadda kahortagga kalsooni-darrada ee la dabaqi karo iyo inaan ka fogaano handhaqanada wax u dhima tartanka cadaaladda ah iyo furan. Tani waxay ka dhigan tahay, tusaale ahaan, inaadan la geli karin wax heshiis ah (ha ahaado mid rasmi ah ama rasmi ahayn) alaab-qeybiye ama dhinac saddexaad oo kale oo si sharci-darro ah caqabad ugu ah loollanka. Waa inaan sidoo kale ka fogaanaa doodaha iyo heshiisyada lala galayo loollameyaasha ka hor istaagi kara dadka kale inay helaan faa'iidooyinka loollanka–- xitaa haddii loollamuhu soojeediyo ama haddii mawduucu ka soo baxo dhacdo ganacsi. Intaa waxaa sii dheer, waxaan ku hawlanaanaa iibin iyo habdhaqanno suuqgeyn run ah oo sax ah waxaanna iska ilaalinaa sameynta khiyaano, caddaalad-darro ama sheegasho aan sax ahayn oo ku saabsan badeecadahayaga iyo adeegyadayada. SWixii ku aadan macluumaad gaar ah oo ku saabsan sharciyada lagu dabaqi karo ama si loo helo hagitaanka, la xiriir Waaxda Sharciga (ChiefLegalOfficer@bbw.com).

# La Falgalidda Dawladaha

## Annagu si run iyo qumman ayaan ula dhaqanna cidaha dowladda ka soo jeedda.

Hadduu kula soo xiriiro wakiil dawladeed ama sharciyeed oo ay kaa codsadaan inaad bixiso macluumaad ama aad oggolaato adoo wakiil ka ah shirkadda, raac habraacyada waaxdaada ama dukaankaaga. Marnaba adoo og ha siin macluumaad been ah ama marin habaabin ah sarkaal dawladeed ama wakiil ama ha baabi'in diiwaanada la xiriira baaritaanka oo marnaba ha u tilmaamin ama ha ku dhiirigelin danwadaag kale inuu sidaasi sameeyo.

Waxaad la wadaagi kartaa macluumaad ku saabsan shaqadaada dadka kale ama waad la shaqayn kartaa hay'ad kasta oo ku hawlan habdhaqanada shaqaaleynta loo siman yahay. Waxaad sidoo kale soo sheegi kartaa ku xadgudubyada suurtogalka ah ee sharciyo kasta oo dawladeed ama hay'adeed ama shirkadeed ama waxaad samayn kartaa shaacin kasta oo kale oo hoos timaada sharciyadda iyo qawaaniinta la dabaqi karo. Ugama baahnid oggolaansho hore shirkadda si aad u samayso warbixinnada noocaas ah, oo lagaagama baahna inaad ogeysiiso shirkadda inaad sameysay warbixinnada noocaas ah. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan ka jawaabida su'aala weydinta dawladda ama sharciyeed, waa inaad caawimaad ka raadsataa Waaxda Sharciga (ChiefLegalOfficer@bbw.com)

# Kaqeybgalka Siyaasadeed

## Waxaan aamminsannahay in ku lug lahaanshaha hawlaha siyaasadeed ee ka jira bulshooyinka aan u adeegno ay u yihiin muhiim guusheena.

Shirkadda ayaa ka qaybgasha arrimaha siyaasadda guud oo waxa dhici karta inay qaadhaan siyaasadeed u bixiso sida u sharcigu oggol yahay. Waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansamida Anshaxa iyo Arrimaha Dawladeed waa inay horay u ansixiyaan adeegsi kasta ama u ballanqaad kasta lacagta shirkadda ama kheyraadka kale ee shirkadda hawlaha siyaasadeed.

Shirkadda ayaa sidoo kale kala xiriirta saraakiisha iyo hay'adaha dawladda ee adduunka oo dhan arrimaha ku saabsan siyaasadda guud ee laga yaabo inay saamayaan ganacsigayaga. Maadaama ololeynta si adag looga xakameeyo heerarka shaqo oo dhan, waaxda Arrimaha Dawladda waa inay horay u ansixiyaan hawlaha ololeynta si loo metelo shirkadda.

# Laaluushka iyo Musuqmaasuqa

## Annagu waxaa naga go'an inaan isticmaalno dhaqanada ganacsiyeed ee daacadnimada iyo anshaxa ku dheehan.

Waxaan raacnaa dhammaan sharciyada khuseeya iyo kuwa la dagaalanka laaluushka mana u dulqaadano laaluushka, masuqmaasuqa ama dhaqanka anshax-darrada ah noocuu doono ha ahaadee meel kasta oo aan ganacsi ku leenahay.

Iyadoo ay jiraan waxyaabaha kale, sharciyada la dagaalanka musuqmaasuqa iyo siyaasadayada caalamiga ee la dagaalanka musuqmaasuqa waxay mamnuucayaan in qof kasta loo soo bandhigo ama la siiyo wax qiimo leh si uu uga helo faa'iido aan munaasib aheyn shirkadda, iyadoo aan la eegin dhaqanka maxalliga ah ama caadada ah, iyo xitaa haddii diidmada taasi ay khasaaro ugu jirto ganacsigayaga. Kalmada “wax kasta oo qiimo leh” waa in si ballaaran loo qeexaa oo aan lagu darin kaliya lacag caddaan ah ama wax lacagta caddanka ah u dhigma sida kaararka hadiyadda, laakiin sidoo kale, waxyaabo kale, qiimo dhimis, hadiyado, madadaalo, tikidhada munaasabadaha, cuntada iyo cabbitaanada, gaadiid-raaca, kharashka loojka iyo ballanqaadyada shaqaaleynta mustaqbalka. Mamnuucidan ayaa sidoo kale khuseysa dhinacyada saddexaad; ma weydiisan karno ama uma oggolaan karno dhinac saddexaad inuu qaado tallaabo kasta oo innagu toos u qaadi karin. Sidaas awgeed, waxaan u baahan karnaa dib-u-eegis dheeraad ah oo dhinacyada saddexaad qaarkood iyo inaan hubinno in heshiisyadayada ay ku jiraan qoddobo la dagaallanka musuqmaasuqa ku habboon.

Waa inaad isla markiiba soo sheegtaa tuhuno kasta oo adgudubyo ama codsi kasta oo laaluush ama lacag-bixinta kale ee aan habboonayn. Wixii su'aalo iyo hagitaan ah, kala xiriir Waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U Hogaansanaanta Anshaxa barta EthicsandCompliance@bbw.com.



## Fursad Waxbarasho

**Waxaan ka shaqeeyaa waddan kale oo mid ka mid ah danwadaagta maxalliga ah ayaa ii sheegay in bixinta laaluush yar ay tahay qaab caado ah oo loo ganacsado oo wax loo fududeeyo. Maxaan sameeyaa?**

Lagama yaabo inaad laaluush bixin karto. Xitaa haddii bixinta laaluush ay u muuqato habka ugu fudud ee wax loo sameyn karo, had iyo jeer waa wax aan habboonayn. Waa inaadan soo bandhigin ama aadan bixin laaluush ama ha u oggolaan qof kale inuu bixiyo laaluush isagoo ku hadlaya magacaaga ama magaca shirkadda, iyadoo aan la eegin sida ay "caaddo" u tahay. Haddii shuraako ganacsi ama alaab-qeybiye ay soojeediyaan inaad bixiso laaluush, waa inaad isla markiiba u soo sheegtaa dhacdada waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansamida Anshaxa.

**Alaab-qeybiye ayaa ii sheegay in mararka qaar ay lacag siiyaan saraakiisha dawladda si looga fogaado lacagaha kastamka iyo canshuuraha laga qaado agabka ay shirkadda u qeybiyaan. Tani waxay u badan tahay inay shirkadda lacag u dhaqaaleyso, balse waa caadi?**

Maya. Waxaan filaynaa in shuraakadayada ganacsi ay u hoggaansamaan sharciga waxaana la ganacsan doonnaa keliya alaab-qeybiyeyaasha u dhaqma si anshax leh iyo sharci ah. Waa inaad u soo sheegtaa dhaqanka alaab-qeybiyaha waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansamida Anshaxa isla markiiba.

# Hadiyadaha Ganacsi iyo Martigelinta

## Waxba kuma beddeleno hadiyado ama martigelin cid saddexad bixinayso taasoo u ekaan karta isku day ah in si aan habbooneyn ay saameyn ugu yeeshaan go'aan ganacsi.

Siyaasadan waxaa la dabaqi karaa haddii aad tahay bixiyaha ama qaataha. Hadiyadaha waxa ka mid ah lacagta kaashka ama kuwa u dhigma (kaararka hadiyadda, caddaymaha hadiyadaha, naqidda iyo sicir dhimista), badeecad, axsaanta shakhsiyeed, gaadiidka, hoyga socdaalka ama fasaxa, ganacsi fursado shaqo (sida fursad carbis shaqeed) iyo wixii kale ee qiime leh. Martigelinta waxaa ka mid ah cuntada ganacsiga, khamriga, tikidhada xafladaha (dhacdooyinka isboortiga, riwaayadaha, tiyaatarka, iwm.), noocyada kale ee madadaalada iyo safarka la xiriira. Waa inaad si adag ugu hoggaansanaantaa xakabadaha iyo shuruudaha lagu qeexay siyaasadan; ka-dhaafitaano kasta waxaa loo baahan yahay inay ansixiyaan waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansanaanta Anshaxa.

## Hadiyadan & Siyaasaddan Martigelinta laguma dabaqi karo hadiyadaha la siiyo saraakiisha dawladda. Shaqaaluhu waxa waajib ah inay helaan oggolaansho marka hore inta aysan bixin wax qiime leh (oo ay ku jiraan hadiyadaha iyo martigelinta) oo la siiyo sarkaal dawladeed si loo hubiyo u hoggaansanka dhammaan sharciyada. lagu dabaqi karo iyo Siyaasadda La-dagaallanka Musuqmaasuqa Guud ee shirkadda.

Iyadoo siyaasadan ay bixinayso tilmaamooyin guud oo la xiriira siinta iyo helida hadiyado iyo martigelin, Bath & Body Works waxay soo rogi kartaa xayiraadyo xaddidaad badan leh oo loogu talagalay gobolo, waaxyo ama shaqooyin gaar ah. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid hadiyado iyo martiqaad, waa inaad caawimaad ka raadsataa waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansamida Anshaxa.

# Bixinta Hadiyadaha iyo Martigelinta

Waxaa jira waqtiyo aad rabi karto inaad hadiyado ama martigelin u fidiso xiriir ganacsi. Marnaba ma bixin doono wax qiimo leh si aan saameyn ugu yeelano go'aan ganacsi ama aan u sameyno dalabyo laga yaabo in loo arko inay sidaasi yihiin. tan iyo inta aysan arrinta sidaasi ahayn, iyo haddii ay sida kale la jaanqaadayso qiimkayaga oo uu ansixiyay maamulahaaga, waxaad bixin kartaa:

- hadiyado ama martigelin qiimahoodu yahay $50 ama ka yar;
- cunto ganacsi haddii aysan ahayn kuwo dhaqaallo-dareyn ah;
- casuumaada munaasabad marmar dhacdo marka kharashaadka la xiriira ay macquul, caadi iyo habboon yihiin, waadna kala qeybgeli doontaa munaasabadda dhinaca ka baxsan shirkadda; iyo
- kaararka hadiyadaha ee shirkada ee loogu talagalay badeecadaha Bath & Body Works ee qiimahoodu yahay $50 ama ka yar.

Marnaba ma bixin kartid ama siin kartid:

- lacag cad;
- waxyaabo u dhigma lacagta caddaanka ah sida kaararka hadiyadaha (marka laga reebo kaararka hadiyadaha ee shirkada sida kor lagu sharraxay), shahaadooyinka hadiyadaha, kaararka qiimo-dhimista iyo lacag-celinnada;
- wax kasta oo qiimahoodu ka badan yahay $50;
- hadiyad kasta ama martigelin kasta oo la dalbado (taasoo ah, dhinaca ka baxsan shirkadda inuu ku weydiisto hadiyadda ama martigelinta);
- wax kasta oo qiimo leh sida gacmo isdhaafsiga; ama
- wax kasta oo keeni kara dadka kale inay ku xadgudubaan halbeegga shaqo-bixiyahooda.

Had iyo jeer maanka ku hay in shuraakada ganacsi ee aan la shaqayno ay leeyihiin sharciyo u gaar ah oo ku saabsan qaadashada hadiyadaha iyo martigelinta, waana inaadan weligaa bixin wax ka hor imaanaya sharciyadaas.

Hadiyad ama martigelin kasta oo aad bixiso waa in miisaaniyad lagu daraa oo si sax ah loogu shaaciyaa si faahfaahsan diiwaankayaga maaliyadeed.

## Fursad Waxbarasho

**Sidee ayaan ku ogaadaa in cunto aan la qaatay alaab-qeybiye ama dhinac kale aysan u ahayn dhaqaallodareyn? Ma jiraan wax ay tahay inaan sii sameeyo si aan uga fogaado xadgudubka suurtagalka ah oo Xeerka?**

Waa inaad isweydiisaa haddii nooca cuntada–-goobta, qiimaha – ay macquul iyo caadi ku tahay duruufaha jira. Si looga fogaado xadgudub ku imaan kara Xeerka, haddii alaab-qeybiye ama qof saddexaad uu kugu casuumo cunto, waxaad soojeedin kartaa goob aad ogtahay inay macquul tahay oo hubi inaad kala hadasho kulanka maamulahaaga kahor intaadan ka qeybgalin.

**Alaab-qeybiyaha Bath & Body Works ayaa kafaalaqaadaya munaasabad isboortis ah waxayna iigu casumeen inaan ugu soo qeybgalo si ay iigu "mahadceliyaan" cusbooneysiinta qandaraaskooda ee muddada saddex sanno kale ah. Qaar ka mid ah maamuleyaasha iyo wakiiladda muhiimka ah ee alaab-qeybiyaha ayaa ka soo qeybgeli doonaan munaasabadda waxayna ii noqon doontaa fursad aan kula xiriiro iyaga. Miyaan aqbalaa?**

Maya. Ma aqbali kartid martigelin abaalmarin kuu ah shaqsi ahaan marka aad qabatay ganacsi shirkadeed. Waqti-ka-waqti, waax ama koox ayaa kala qaybgeli karta "munaasabad dabaaldeg" iibiye marka la soo gabagabeeyo mashruuc weyn, balse ma jiro danwadaag gaar ah oo ka faa'iidi kara la shaqeynta iibiyaha.

# Aqbalida Hadiyadaha iyo Martigelinta

Marnaba ma aqbali kartid hadiyadaha ama martigelinta ka timaada alaab-qeybiye, iibiye ama cid kasta oo kale oo saddexaad haddii ay jirto sabab kasta oo aad u aaminsan tahay in dhinaca saddexaad rabo inuu saameyn ku yeesho go'aannada ganacsiga ama wax kala ibsiga ganacsiga. Marna waa in aadan hadiyado ama martigelin ka codsan dhinac saddexaad. Aragtida sidoo kale waa muhiim. Had iyo jeer waa inaad ogaato sida falka aqbalidda hadiyad ama martigalin ay dadwaynuhu u arki karaan, cidda shirkaddu wax ka soo gadato u arki karaan, ama shaqaalaha kale u arki karaan.

Haddii aad si buuxda ugu qanacsan tahay in bixiyuhu uusan isku dayi rabin inuu saameyn ku yeesho ganacsiga oo aqbalaadda hadiyaddu aysan ka dhalan doonin aragti taban, markaa waad aqbali kartaa:

- hadiyado qiimaheedu yahay $50 ama ka yar;
- cuntooyinka ganacsi (ama waxyaalaha u dhigma kaarka hadiyadda maqaayadaha cuntada ama adeegga keenista cuntada) haddii aysan ahayn mid kharash badan;
- casuumaad lagu tagayo munaasabad marmar dhacdo haddii kharashaadka la xiriira ay macquul, caadi iyo habboon yihiin, waxaad la aadi doontaa munaasabadda dhinaca ka baxsan shirkadda oo maareeyahaaguna waa inuu ansixiyo; iyo
- hadiyadaha si fudud u xumaada haddii lala wadaago kooxda ama lacagta u dhiganta hadiyadda loogu deeqo hay'ad samafal (tusaale ahaan, Associates for Associates).

Hawlwadaagayaasha ku sugan Aasiya waxay hal baqshada lai see/hongbao/guduudan ah oo lagu qiimeeyo $15 ama ka yar ka aqbali karaan qof, shirkad ama koox iibiyeyaal ah oo ka baxsan Bath & Body Works hal fasax ama munaasabad sannad kasta.

Marnaba ma aqbali kartid:

- lacag cad;
- waxyaabaha u dhigma lacagta caddaanka ah (oo ay ku jiraan kaararka hadiyadaha, shahaadooyinka hadiyadaha, kaararka qiimo-dhimista iyo lacag-celinnada);
- wax kasta oo qiimahoodu ka badan yahay $50 (marka laga reebo hadiyadaha halaaba ee kor lagu sharraxay);
- wax kasta oo qiimo leh sida gacmo isdhaafsiga; ama
- wax kasta oo sababi kara dadka kale inay ku xadgudubaan halbeegyada shaqo-bixiyahooda.

Marar dhif ah marka diidista ama soo celinta hadiyad ama martiqaad ay noqoneyso mid aan macquul ahayn ama laga xishoodo, waana inaad isla markiiba la socodsiisaa waaxda Anshaxa Caalamiga ah & U hoggaansamida Anshaxa si ay kaaga siiyaan talo sida loogu maareeyo hadiyada si caddaalad ah oo ujeeddeysan oo aan adiga shaqsi ahaan aadan ka faa'ideyn, sida inaad sadaqo ahaan loogu deeqo xaraash lacag-uruurin ama samafal shirkaddu kafaalo-qaado. Waa inaad sidoo kale isla markiiba la socodsiisaa waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansamida Anshaxa wixii ku saabsan hadiyad ama martigelin kasta oo kale ah oo aad aaminsan tahay in la bixiyay iyadoo lagu xadgudbay siyaasadayada.



# Daacadnimada Maaliyadeed iyo Diiwaanada Saxda ah

## Waxaan hubinnaa in diiwaanada shirkadaas ay sax yihiin, waqtiyaysan yihiin oo ayna si dhammaystiran u muujinayaan wax kala ibsiga dhabta ah iyo dhacdooyinka.

Saami-haystaashayada, macaamiishayada, dadka aan la shaqayno, dadweynaha iyo qolooyinka dowladda ayaa u mudan inay helaan diiwaanno sax iyo run ah. Waxaan u isticmaalayno hantida shirkadda sida u habboon waxaana muujinaa dhammaan kharashaadka, iswedaarsiyada maaliyadeed iyo deymaha si ku habboon diiwaanadayada ganacsi. Waxaa mas'uuliyad kaa saaran inaad sameeyso diiwaan sax ah oo dhammaystiran oo aad raacdo xakamaynada gudaha. Waligaa ha ka been sheegin wax diiwaan ama dukumiinti ah sabab kasta ha ahaatee. Ha isku dayin inaad hareer marto kontaroolada gudaha iyo geedi-socodyada. Wixii ujeeddooyinka siyaasaddan ah, kelmada “diiwaannada” waxaa ku jira wixii macluumaad ah ee aan qorno ama xafidno, iyadoo aan la eegin qaabka. Haddii aadan hubin wax ku saabsan waxa loo baahan yahay, kala hadal maareeyahaaga ama Anshaxa Caalamiga ah & U Hoggaansanaanta Anshaxa.

## Fursad Waxbarasho

**Kama shaqeeyo maaliyadda ama xisaabaadka. “Daacadnimada maaliyadeed” ma mas’uuliyad i saaran baa?**

Haa. Qorista diiwaan sax ah waa qof walba shaqadiisa. Laga soo bilaabo warbixinada kharashka iyo foomamka diiwaangelinta dheefaha, ilaa diiwaanka alaabaha iyo qaansheegyada iibabka, dhammaan wax kala ibsiga ganacsi —-ha ahaadeen kuwo caadi ah ama aan caadi ahayn – waa inay ahaadaan kuwo sax ah, dhammaystiran oo si habboon loo qoray.

**Waxaan arkay shaqo-wadaage saxiixaya warbixin baaritaan iyadoo dhabtii uusan sameynin baaritaanka. Maxaan sameeyaa?**

Waa inaad u soo sheegtaa arrinta waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hogaansanaanta Anshaxa ama Khadka Tooska ah ee Anshaxa. Saxiixida warbixinta shaqaale uusan sameynin baaritaanka waxaa loo tixgelin karaa nooc ka mid ah diiwaanada been-abuurka ah iyo u dhaqmida si aan daacad ahayn waxayna xadgudub ku tahay Xeerka Anshaxa.

# Xiriirka u dhexeeya adiga & shirkaddu kalsooni kama soo harto.



# Ilaalinta Macluumaadka Shaqsiyeed iyo Midka Ganacsi

## Waxaan hantidayada macluumaad ka ilaalinaa khataraha amniga, waxaana shaqaalahayaga, macaamiishayada, iibiyeyaashayada, iyo qandaraasleydayada ka ilaalinaa xadgudubyada asturnaanta.

Waxaan u hoggaansanaa sharciyada la dabaqi karo waxaana hirgelinaa halbeegyada amni ee la aqoonsan yahay si aan macluumaadka ugu ilaalino si waafaqsan sharciga lagu dabaqi karo, siyaasadahayaga iyo qiyamka shirkadayada. Waajibaadkayaga ku aadan ilaalinta macluumaadka wuxuu khuseeyaa macluumaadka ah qaab waraaqo iyo midka ah qaab elektaroonig labadaba.

Waa inaad u uruurisaa oo aad u isticmaashaa macluumaadka keliya sida loogu baahan yahay si loo sameeyo ganacsiga shirkadeed oo waa inaad keydisaa macluumaadkaas keliya ilaa iyo inta ay lagama maarmaanka u tahay ujeeddooyin sharci ama kuwa ganacsi oo la oggol yahay. Waa inaad xaqiijisaa inaan ilaalino macaamiishayada iyo shaqaalahayaga adigoo adeegsanaya dhaqamada ganacsi ee waafaqsan ururinta xogta, isticmaalka xogta, doorashada xogta, meelaynta xogta, tuurista xogta, wareejinta xogta, iyo isgaarsiinta, xayaysiinta, falanqaynta, iyo maamulka iibiyaha (wadajir iyo shaqsi ahaan, loogu yeero "ka shaqaynta" xogta). Intaa waxaa sii dheer, waa inaad hubisaa in alaab-qeybiyeyaasha iyo iibiyeyaasha heli kara macluumaadka macmiishayada ama ganacsigayaga ay u hoggaansamaan sharciyada iyo siyaasadahayaga lagu dabaqi karo. Haddii aadan hubin shuruudaha, la xiriir Waaxda Sharciga si aad u hesho hagis ku saabsan habdhaqamada macluumaadka ee u hoggaansan sharciyada.

Haddii aad heli karto macluumaad qarsoodi ah oo xasaasi ah ama aad kormeerto ka shaqaynta/habaynta xogta, waa inaad la shaqeysaa kooxaha saxda ah gudaha shirkadda si aad u xaqiijiso u hoggaansanaanta sharciyada khuseeya, siyaasadaha iyo nidaamyada shirkadda ee la xiriira: (1) in macluumaadkaas laga badbaadiyo oo laga ilaaliyo gelitaanka iyo shaacinta aan la ogalayn, iyo (2) kaliya habaynta xogta ee sharciga ah (tusaale, shakhsiyaynta macaamiisha, falanqaynta, iyo qaybinta).

Waa in aadan marnaba u adeegsan hantiyadeena macluumaadka inaad ku faa'ido ama aadan uga shaqeyn macluumaad shirkadeed oo kale iyo macluumaadka aan la shaacin in aad ugu faa'iidayso Bath & Body Works adigoon shirkaddaas ka haysan oggolaansho qoraal ah iyo dib u-eegida iyo ansixinta Waaxda Sharciga. Sirta ganacsiga ayaa ah tusaalaha macluumaadka ganacsiga ee ay tahay inaan ilaalino. Marka lagu daro ilaalinta siraha ganacsi ee Bath & Body Works ma shaacin kartid siraha ganacsiga ee alaab-qeybiye kasta ama iskaashatada ganacsiga ama shirkad kasta oo aad markii hore u shaqeyn jirtay. Ixtiraam waajibaadka danwadaagta kale si loo ilaaliyo qarsoodida shaqo-bixiyeyaashii hore. Ha soo dejisan, qeybin, haysan ama soo saarin nuqullada aan la oggoleyn ee tusmooyinka buugaagta, majalladaha, wargeysyada, filimada, muuqaallada cajaladaha muusikada, mareegaha, baddeecooyinka ama barnaamijyada kumbuyuutareed.

Waaxyo iyo hawlo cayiman oo shirkadeena katirsan ayaa laga yaabaa inay sidoo kale hoos yimaadaan shuruuc qaas ah oo ku aadan asturnaanta (loo yaqaan sharciyada "qaybta/waaxda"). Hal tusaale ayaa ku lug leh ku-dhaqanka sharciyada laxiriira sirdoonka cusub ee macmalka ah ("AI") ee loogu talagalay shaqooyinka sida xaqiijinta codsiyada shaqaaleynta. Waa inaad raacdaa shuruudaha asturnaanta ee khuseeya aagag gaar ah oo ganacsi iyo doorkaaga ama shaqadaada. Xafiiska Asturnaanta ula xiriir wixii ah xeerarka iyo waajibaadkaaga. Waxaad keliya u baabi'in kartaa macluumaadka iyo diiwaannada si waafaqsan siyaasadaha maareynta diiwaanada shirkadda oo marnaba ma baab'in kartid adigoo ka falcelinyo ama ka hortagayo hantidhowrid, baaritaan ama dacwad la filayo. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan shuruudaha qorista diiwaanka ee khuseeya shaqadaada, la xiriir Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansamida Anshaxa.

Macluumaadka shaqsiyeed ee ku saabsan danwadaagta, macaamiisha, alaab-qeybiyeyaasha iyo iibiyeyaasha waa in si sugan loo maareeyaa. Haddii aad ka shakisan tahay jabsiga macluumaad xasaasi ah ama mid shakhsiyeed, Xarunta Hawlgallada Degdegga ah (Emergency Operations Center, EOC) kala xiriir 800-765-7465, ama Xafiiska Asturnaanta ee Waaxda Sharciga kala xiriir privacy@bbw.com.

## Fursad Waxbarasho

**Waa inaadan weligaa:**

- La wadaagin lambarka sirta ah ee nidaamkaaga qof kale.
- Uga tagin laptop-ka ama telefoonada gacanta ee kale meel cidlo ah markaad safraysid ama meel banaan oo laga xadi karo.
- Ku shubin softiweerka aan la oggoleyn ama shati la'aanta ah aaladaha Bath & Body Works.

**Waxaan iimayl ugu diray warbixin alaab-qeybiye waxaana si shil ah ugu lifaaqay warbixin ay ku jiraan cinwaanada iimayl oo ay leeyihiin macaamiisha Bath & Body Works badankooda. Maxaan sameeyaa?**

Waa inaad isla markiiba ka codsataa alaab-qeybiyaha inuu masaxo iimaylka oo aad ku wargelisaa dhacdada Xafiiska Asturnaanta ee Waaxda Sharciga adigoo adeegsanayo barta privacy@bbw.com.

**Alaab-qeybiye la qaddariyo ayaa doonaya inuu xayeysiiyo baddeeco cusub wuuna ila soo xiriiray si uu u helo liiska iimaylka danwadaagta si ay u ballaariyaan suuqgeyntooda. Ma la wadaagaa liiska?**

Maya. Wax kasta oo la xiriira aqoonsiga hawlwadaagayaasha, sida cinwaanada iimaylka ee gaarka ah, talefoon lambarada, macluumaadka mushaarka, iwm., waa macluumaad shakhsiyeed waana in lala wadaagin alaab-qeybiyeyaasha-–ama xitaa hawlwadaagayaasha kale ee aan haysan cadaymo ganacsi oo ay ku helaan macluumaadka.

# Hantidhowrida iyo Baaritaanada

## Waxaan si buuxda ugu hoggaansanaa hantidhowridaiyo baaritaanada gudaha iyo dibadda ee ku xadgudubyada suurtagalka ah ee siyaasadaha shirkadda.

Ha baabi'in ama ha beddelin wixii dukumiinti ah ee laguu weyddisto iyada oo qayb ka mid ah baaritaan ama hantidhoe magaca shirkadda. Ha sheegin been, si ula kac ah ha u sheegin bayaano been ah ama marin habaabin ah, ama ha ka gaabin inaad siiso macluumad sax ah hantidhawreyaasha ama baareyaasha gudaha ama dibadda ama ha u horseedin dadka kale inay sidaas sameeyaan.

# Isticmaalka Hantida Shirkadda

## Waxaan u istcimaalnaa waqtiga shaqada iyo hantida shirkadda si ay faa’ido u hesho shirkadda.

Hantida shirkadda waxa ka mid ah goobaha, macluumaadka, qalabka, dukumentiyada, xogta, soofweerka, hantida teknoolojiyadda, sahayda, iyo beeca, samballada, iyo adeegyada taageerada. Isticmaalka aan habboonayn ee hantida shirkadda ayaa lam soo gudboonayn karta shirkadda halis sharciyeed ama lacageed. Siyaasadayadeena Iyo Heerarkeena Isticmaalka ee La Aqbali Karo waxay oggol yihiin in marmar loo adeegsado dhismaha shirkada muddo cayiman, hawlaha shaqsiyeed ee aan la diidi karin. Adiga ayaa mas'uul ka ah qaadida tallaabooyin macquul ah si aad uga dhowrto hantida Bath & Body Works adiga magangalyadaada xatooyada, si xun u isticmaalka, luminta ama waxyeeleynta. Marka laga reebo sida uu sharcigu xaddiday, wax rajo ah kama lihid asturnaanta la xiriirta qalabka isgaarsiinta ee Bath & Body Works (sida iimaylka ama aaladaha fariimaha shirkada) ama markaad isticmaaleyso shabakadda shirkada. Bath & Body Works waxay xaq u leedahay-–oo ay sameysaa–-kormeerka aaladaha iyo qalabka isgaarsiinta, oo ay ku jiraan waxyaabaha ay ka kooban yihiin iyo isticmaalkooda.

# Macluumaadka Xog-Ogaalka

## Waxaan u hoggaansanaa sharciyada ganacsiga ee gudaha.

Macluumaadka xog-ogaalka loo yahay ayaa ah macluumaad (ku saabsan shirkaddayda ama shirkad kale) aan la shaacin oo sidoo kale muhiim ah-– waa, macluumaad maalgashade macquul ah uu u arko inuu yahay macluumaad muhiim ah si uu u gaaro go’aan ah inuu iibsado, iibiyo ama haysto saamiyada ama in kale. Siyaasadaha shirkadda iyo sharciga ayaa si adag u xaddididaya waxa aan samayn karno markaan hayno macluumaad xog-ogaal. Tusaalooyinka macluumaadka muhiimka ah waxaa ka mid ah kasbashada iyo natiijooyinka kale ee maaliyadeed, xogta iibka, heerarka diiwaanka alaabaha, isbeddelada maamulka, qorsheyaasha wax soo iibsiga, iibka ama ku biirinta iyo xeeladaha ganacsiga.

Kama ganacsan kartid badeecada iyo damaanadaha kale ee Bath & Body Works inta aad hayso macluumaad muhiim ah, aan la shaacin oo ku saabsan shirkadda. Tani waxay khusaysaa dhammaan hawlwadaagayaasha Bath & Body Works iyo qoysaskooda. Ka ganacsiga wax aka mid ah ka mid ah iibsashada, iibinta, iyo wareejinta tafaasiisha koontada, qoondaynta maalgashiga iyo tilmaamaha maalgashiga ee ku jiora qorshaha shirkadda.

Ma samayn kartid, si toos ah ama si dadban, inaad dhigto, aqbasho, ama si kale uga qayb qaadato sharad, khamaar, ama macaamil suuq saadaalin ah oo ku saleysan, tixraacaya, ama qiime ka helaya waxqabadka, dakhliga, natiijooyinka maaliyadeed, ama dhacdooyin kale oo muhiim ah oo la xiriira Bath & Body Works. Sidoo kale, laguuma oggola inaad ku lug yeelato hawlaha noocaas ah ee la xiriira shirkad kasta oo Bath & Body Works ganacsi la leedahay ama shirkad kasta oo ku jirta macaamil ama xiriir ganacsi oo suurtagal ah oo lala yeelanayo Bath & Body Works.

Ha la wadaagin cidna macluumaadka gudaha marka laga reebo haddii ay jirto baahi ganacsi si ay u ogaadaan mooyee oo marnaba ha ku wadaagin macluumaadka xog ogaalka meel ka baxsan Bath & Body Works.

## Fursad Waxbarasho

**Kama shaqeeyo maaliyadda ama ma heli karo macluumaad maaliyadeed. Miyay mamnuucyada ku saabsan ganacsiga xog-ogaha i khuseysaa?**
Haa. Qof kasta oo og macluumaad qarsoodi ah, muhiim ah wuxuu jebin karaa sharciyada ganacsiga xog-ogaalka haddii ay ka ganacsadaan macluumaadkaas ama u sheegaan macluumaadkaas dhinacyo saddexaad oo markaa ka ganacsada saamiyada iyadoo lala xiriirinayo macluumaadka. Waa inaad taxaddar muujisaa oo aadansheegin macluumaadka shirkadda ee qarsoodiga ah xitaa inta lagu gudajiro wadahadalka iska caadiga ah ee qoyska iyo asxaabta.

**Kulan aan la qaatay mid ka mid ah iibiyeyaashayada, waxaan ku ogaaday macluumaad saameyn kara qaar ka mid ah saamiyada ganacsi ee seedigay tixgelinayo. Ma wadaagi karaa waxa aan ogahay maadaama aysan wax faa'ido ah iigu jirin shaqsi ahaan?**
Maya. Sharcigu kaliya kaama mamnuucayo iibsashada ama iibinta saamiyada iyadoo laga duulayo macluumaad sir ah, sidoo kale wuxuu kaa mamnuucayaa inaad u sheegto seedigaa (ama cid kale) si si uu uga ganacsado.

**Saaxiib ayaa i weydiiyay inaan u xaqiijin karo in baloog internet oo sheeganaya Bath & Body Works inuu daahfurayo qeyb cusub oo waxyaabaha guriga lagu carfiyo sannadka xiga. Miyaan u sheegi karaa waxa aan ogahay?**
Maya. Qorshaha baddeecada iyo macluumaadka daahfurka waa macluumaad qarsoodi ah mana ahan in lagala hadlo cid ka baxsan shirkadda haddii macluumaadka la shaaciyay mooyaane. Haddii aad su'aalo ka qabtid wax ku saabsan in macluumaadka qaarkood la shaaciyay, fadlan la xiriir maareeyahaaga ama Isgaarsiinta Bath & Body Works (communications@bbw.com).

# Hantida Aqooneed

## Hantida aqooneed ayaa ka mid ah hantida ugu qiimaha badan.

Hantidayada aqooneed waxa ka mid ah abuuritaannada sharci ku ilaalshan, sida xuquuqda minguurka, astaamad ganacsi, shatiyada, magacyada naqadeed, xuquuqda qaabaynta iyo sirta ganacsiga. Shaqada aad u qabato ka qayb ahaan waajibaadkaaga shaqo, oo ay ku jiraan ikhtiraacyada, nashqadaha, aqoonta farsamo ama hal-abuurada iyadoo la adeegsanayo waqtiga, khayraadka ama macluumaadka shirkadda, sidoo kale waxaa iska leh shirkadda.

Si loo difaaco shirkadda iyo sidoo kale naftaada, waxaan kaa rajeyneynaa inaad soo sheegto qeybinta badeecada been abuurka ah ama qeybinta kale ee aan munaasabka aheyn ee badeecadahayaga. Waxaan kaa fileynaa inaad u hoggaansanaato sharciyada xukmiya xuquuqda daabacaadda, calaamadaha ganacsiga iyo hantida kale ee aqooneed, oo ay ku jiraan xuquuqda daabacaadda, calaamadaha ganacsiga iyo summadaha ganacsi ee shirkaddu leedahay. Marna ha adeegsan xeelado khiyaano ama sharci-darro si aad uga hesho macluumaad ku saabsan hantida aqooneed ee loollameyaasha. Haddii aadan hubin arrimaha ku saabsan isticmaalka habboon garaadka hantideena, weyddii maareeyahaaga ama waaxda Sharciga (ChiefLegalOfficer@bbw.com).

# Wadaxiriirada Dibadeed

## Keliya danwadaagta idman ayaa la xiriiri karta dadweynaha iyagoo metelaya shirkadda.

Shirkadda ayaa siidaysa macluumaadka la xiriira guusha iyo tafaasiisaha maaliyadeed iyo ee ku saabsan arrimaha iyo xeeladaha muhiimka ah keliya iyadoo u marta danwadaagta u idman inay ugu hadlaan si guud magaca shirkadda.

Shirkadda ayaa jawaabi doonta maalgashadayaasha iyo warbaahinta oo kaliya iyada oo u marta afhayeenkeeda wakiilka u ah. Haddii abid lagu weydiisto inaad faalo siiso maalgashadeyaal ama warbaahin iyadoo aad metelayso magaca shirkadda, diid oo ku jihee codsiga qeybta Wadaxiriirada Bath & Body Works.

Dhammaan codsiyada la xiriira hadal jeedin ama isgaarsiin dibadda ah adigoo matalaya shirkadda munaasabadaha sida shirarka warshadaha, bandhigyada waxbarashada, podcast-yada, maqaalada, iyo doodaha guddiyada waa inuu horay u ansixiyaa madaxweyne ku-xigeenka waaxdaada ama mas'uul ka sarreeya iyo sidoo kale Waaxda Isgaarsiinta ee Bath & Body Works. Mararka qaar, Bath & Body Works waxay talo ka raadsan kartaa Sarkaalka Madaxa Sharciga inta aysan ka jawaabin codsigaaga oggolaanshaha. Kama qaybgeli kartid daraasadaha kiisaska, warbixino caddaan ah, qaybaha kale ee daabacaadaha ama gelista abaalmarinada adigoo aan oggolaansho hordhac ah ka helin Wadaxiriirada Bath & Body Works. Haddii adiga ama dhinac saddexaad uu doonayo inuu adeegsado astaamaha shirkada ama magaca goobaha dibeda sida war-saxaafadeedyada, mareegyada daraasada kiisaska ama bandhigyada ganacsi ee dhinacyada dibedda, oo ay ku jiraan warbaahinta, waa inaad horay u sii raadsataa oggolaansho Wadaxiriirada Bath & Body Works (communications@bbw.com).



# Isticmaalida Baraha Bulshada

## Waxaan u adeegsanaa baraha bulshada si mas'uuliyad leh.

Macaamiisha, loollameyaasha iyo danwadaagta ku sugan daafaha caalamka si fudud ay u heli karaan macluumaadka la geliyo baraha bulshada. Dhammaan danwadaagta waa inay raacaan dhaqannada guud ee ugu fiican marka la isticmaalayo baraha bulshada, xitaa adeegsiga gaarka ah.

Haddii aad ku soo magac qaado Bath & Body Works ama mid ka mid ah summadaheena ganacsi ama badeecadaheena qoraal ku saabsan shirkadda waa inaad si cad oo muuqato u sheegtaa xiriirka aad la leedahay shirkadda (tusaale ahaan, "Waxaan u shaqeeyaa Bath & Body Works, waana jeclahay Sawirada Fasaxa ee cusub") waana inaad u hoggaansanto tilmaamaha soo socda:

- Ha ka hadlin macluumaadka qarsoodida ah ama macluumaadka ganacsi ee shirkadda.
- Mar kasta si daacad ah ula xiriir oo, haddii aad fikrad wadaagayso, sheeg in ay tahay fikraddaada oo aysan ahayn fikrad ka socota shirkadda.
- Marna ha geysan faallooyin dhibaateyn, aflagaado, hoos u dhigis ama cabsigelin oo ku saabsan danwadaagta, macaamiisha ama alaab-qeybiyeyaasha kale, maadaama faallooyinka noocaas ah lagu eedayn ama qaadan karo inay yihiin takoor ama dhibaateyn.
- Ha ku hadlin hadalo sharaf dhac ah ama marin habaabin ah oo ku saabsan loollameyaasheena.
- U adeegso Xeerka Anshaxa iyo qiyamkayaga hage ahaan.

# Deeqaha Samafalka ah iyo Dalabaadka

## Waxaa jira waqtiyo aan dhammaanteen dareenno inaan wax ku biirino waxa aan aaminsanahay.

Bath & Body Works waxay ka qaybqaadataa shaqo samafal ah oo laga qabanayo in badan oo ka mid ah bulshooyinkayaga maxalliga ah waxayna Hay'ada Bath & Body Works taageero lacageed siisaa ururada samafalka. Shirkaddu waxay mararka qaarkood weydiisataa danwadaagta qayb ka ah hawlaha samafalka ee ay maalgeliso shirkadda. Dhammaan isgaarsiinada, codsiyada ama dallacaadaha ku aadan hawlwadaagayaasha waxaa kaliya la samayn karaa iyadoo la raacayo siyaasadaha shirkadda iyo marka ay horey u oggolaatay qaybta Xiriirada Bulshada & Muxsiniinta.

Waxaan ku dhiirigelinnaa danwadaagta inay taageeraan ururada samafalka iyo dhaqdhaqaaqyada. Si kastaba ha noqotee, waa muhiim inaan ka difaacno hawlaha shaqo iyo xiriirada aan la leenahay shuraakada ganacsi kuwa ujeedooyinkoodu yihiin inay xayaysiiyaan qaddiyaadahooda shakhsiyeed, baddeecooyinkooda ama aragtidooda. Laguuma oggola inaad kaalmo ama taageero u weydiisato shaqaalaha kale ama dhinacyada saddexaad arrimo la xiriira dantaada gaarka ah gudaha xafiisyadeenna ama xarumahayaga—xataa haddii ay tahay saacadaha shaqada ka baxsan—ama inaad u isticmaasho cinwaankaaga iimeylka shaqada. Intaas waxa dheer, laguuma oggola inaad kaalmo ama taageero weydiisato iibiyayaasha ama bahwadaagta ganacsiga adigoo matalaya shirkadda, adigoon oggolaansho ka helin Waaxda Xiriirka Bulshada & Muxsiniinta. Xataa haddii xiriirka dibadda ay shirkaddu oggoshahay, marnaba dalabaad ha weydiisan iibiye ama shuraako ganacsi haddii ay jiraan isfahan, ra'yi, ama filashooyin cad ama daahsoon kuwaasoo taageerida qaddiyadda samafal ay faa'ido ugu jiri doonto xiriirka iibiyaha ama shurakada ganacsi la leeyahay shirkadda. Dhinacyaa saddexaad waxa ka mamnuuc ah inay ka ololaystaan ama ku qaybiyaan waraaqo milkiyadda shirkadda. Dhammaan isticmaalka lacagaha shirkadda ama khayraadyada lagu sameeyo tabarucaadka waa in ay u hoggaansamaan deeqaha Foundation Grant iyo Corporate Giving ee shirkadda iyo Siyaasadda Kaqaybgalka ee shirkadda waana inay ansixisaa Xiriirka Bulshada & Muxsiniinta (BBWgiving@bbw.com).



# Siyaasadaha La Xiriira

| Qeybta Xeerka Anshaxa | Siyaasadaha La Xiriira |
|---|---|
| Lama Oggola Aargoosi | Siyaasadda Kahortagta Aargoosiga |
| Kahortagga Faraxumaynta | Siyaasadda Kahortagta Faraxumaynta |
| Ka Warbixinta Dhibaataynta, Takoorka & Aargoosiga | Hagitaanka Ka Warbixinta Dhibaataynta, Takoorka & Aargoosiga |
| Goob Shaqo oo Xor ka ah Mukhaadaraadka iyo Qamriga | Siyaasadda Khamriga ee Danwadaagta Caalamiga ah |
| Iskaashi La Yeelashada Alaab-qeybiyeyaasha Mas'uulka ah | Buug Tilmaameedka Xeerka Anshaxa iyo U Hoggaansamida Anshaxa ee Alaab-qeybiyaha |
| Laaluushka iyo Musuqmaasuqa | Siyaasadda La Dagaallanka Musuqmaasaqa Caalamiga ah<br>Siyaasadda Safarka Caalamiga & Dib-u-bixinta Kharashka |
| Hadiyadaha Ganacsi iyo Martigelinta | Siyaasadda La Dagaallanka Musuqmaasaqa Caalamiga ah<br>Siyaasadda Safarka Caalamiga & Dib-u-bixinta Kharashka |
| Tartanka iyo Heshiiska Cadaaladda leh | Siyaasadda Lidka ku ah Kalsoonida (Kahortagga Tartanka Aan Cadaalada Ahayn) |
| La Falgalidyada Dawladaha | Siyaasadda La Dagaallanka Musuqmaasaqa Caalamiga ah |
| Ilaalinta Macluumaadka Shaqsiyeed iyo Midka Ganacsi | Siyaasadda Isticmaalka ee La Aqbali Karo iyo Halbeegyada<br>Siyaasadda Maareynta Diiwaanada Caalamiga<br>Nooca Macluumaadka iyo Siyaasadda iyo Halbeegyada Maareynta Macluumaadka |
| Macluumaadka Xog-Ogaalka | Siyaasadda Ganacsiga Xog-Ogaalka |
| Daacadnimada Maaliyadeed iyo Diiwaanada Saxda ah | Siyaasadda La Dagaallanka Musuqmaasaqa Caalamiga ah<br>Siyaasadda Maareynta Diiwaanada Caalamiga<br>Siyaasadda Safarka Caalamiga & Dib-u-bixinta Kharashka |
| Isticmaalka Hantida Shirkadda | Siyaasadda Isticmaalka ee La Aqbali Karo iyo Halbeegyada<br>Nooca Macluumaadka iyo Siyaasadda iyo Halbeegyada Maareynta Macluumaadka |
| Deeqaha Samafalka ah iyo Dalabaadka | Foundation Grant iyo Corporate Giving iyo Siyaasadda Kaqaybgalka ee shirkadda |

Waxaad la xiriiri kartaa waaxda Anshaxa Caalamiga & U Hoggaansanaanta Anshaxa si aad u weydiiso su'aalo waqti kasta.

Bath & Body Works®

EthicsandCompliance@bbw.com
bbw.ethicspoint.com